**Wadajirka Camden**
**Qorshaha horumarinta beesha ee xaafadda Camden ee 2007-2012**
**(Camden's sustainable community strategy 2007-2012)**

## Hordhac

Waxa aanu ku faraxsanahay inaanu u soo bandhigno qorshaha horumarinta beesha ee cusub ee xaafadda Camden Shuraakada Istaraatiijiga ee maxaliga ah (LSP). Qorshahani waxa uu sharxayaa aragtidayada la wadaago ee mustaqbalka xaafadda Camden.

Waanu dhegeysanaynay. Si ay u hirgeliyaan aragtidan ayay kawnsilarada la soo doortay ay kulan dadweyne ka qabteen xaafadda oo dhan, kaas oo ay boqolaal qof oo dad ahi ay ka soo qayb galeen si ay aragtidooda uga dhiibtaan. Golaha degmadu waxa uu isu keenay dadka deggan, ganacsiyada, iyo adeegyada dadweynaha si ay si qoto dheer ugu eegaan qaar ka mid ah dhibaatooyinka ugu adag ee haysta xaafadda Camden. Dhammaan in ka badan 1200 oo dad ah ayaa door firfircoon ka qaatay wada tashiga.

Aragtida guud waa in ay Camden noqoto *xaafadda fursadda*. Taas macnaheedu waxa weeye in la wada shaqeeyo si looga caawiyo dadka iyo beelaha si ay u gaadhaan awooddooda oo buuxda, dhinaca shaqadooda iyo noloshooda bulshada dhexdeeda.

Waxa aanu doonaynaa in dadka xaafadda Camden ay ku noolaadaan beelo barwaaqo ah oo ammaan ah, oo ay dareemaan in ay ku xidhanyihiin meesha ay ku noolyihiin, iyo iyaga oo og in ay saamayn ku yeelan karaan waxa ka dhacaya hareerahooda.

Waxa aanu doonaynaa in aanu wax ka qabano tallamidda weyn ee xaafadda si wada jir ahna u shaqayno si aanu xuluul ugu helno. Taas macnaheedu waxa weeye in lala qabsado tirada dadka ee sii kordhaysa iyada oo la sii wadayo – run ahaantii la horumarinayo – tayada nolosheena iyo ta jiilalka mustaqbalka. Carqalad kale waa hubaal ka dhigitaanka in ay xaafadda Camden noqoto meel ammaan ah iyada oo la sii wadayo nashaadka iyada ka dhigaya meel xiiso leh oo lagu noolaado.

Qorshahani waxa uu sharxayaa sida aynu wada jir ugu shaqayn karno si aynu isbeddel ugu keeno xaafadda Camden. Taasina waa sababta aanu u soo bandhigayno qorshaha beesha ee ku dhisan aragti himilo leh iyo ballanqaadyo cad.

Anaga, iyo Shuraakada Istaraatiijiga ee Maxaliga ah inteeda kale, waxa aanu ku ballanqaadaynaa oo naga go'an in aanu hubaal ka dhigno in ay xaafadda Camden marka uu sannadku yahay 2012 ay meel fursadeed u noqoto qof kasta.

**Kawnsilar Keith Moffitt**
Guddoomiyaha,, Shuraakada Istaraatiijiga ee Maxaliga ah iyo Hogaamiyaha Dawladda Hoose

**Kawnsilar Andrew Marshall**
Ku Xigeenka Hogaamiyaha Dawladda Hoose

March 2007

## 1. Hordhac

### Waa maxay wadajirka Camden?

Wada Jirka Camden waa qorshe loogu talogalay xaafadda inta u dhaxaysa hadda iyo 2012.

Wadnaha qorshaha beesha – taas oo ah sababta loogu bixiyey qorshaha *horumarinta* beesha – waxa ah ballanqaadka Camden ee ah in ay u horumarto si horumarisa tayada nolosheena iyo ta jiilalka mustaqbalka. Sidaas darteed ayay Wada Jirka Camden ay diirad xooggan saaraysaa isu keenitaanka arrimaha dhaqaalaha, deegaanka iyo bulshada. Tusaale ahaan waxa aynu u baahanahay in aynu isula beddelo kordhitaanka dhaqaalaha iyo dadka si yaraysa raadkeena kaarboonka, dhaqaalaysa meelaheena cagaaran ,daboosha baahiyaha loo qabo hoyga ama guryaha xaafadda isla markaana xoojisa dhismaha loo baahanyahay si loo taageero beesheena.

Qorshuhu waa hal shay, waxqabad dhab ah oo faraq u sameeya nolaha dadkuna waa shay kale. Ballanqaadyada waraaqahani waxa ay ku salaysanyihiin waxa khuseeya ee ay danaynayaan dadka ku nool xaafadda Camden ee kuma salaysna waxa u shaqeeya ururada. Si aanu u oofino ballanqaadyadayada waa muhiim in aynu dhammaanteenba wada shaqayno. Taasina waa sababta qorshaha beesha loola sameeyey Shuraakada Istaraatiijiga ee Maxaliga ah – oo ah koox uu guddoomiyo Hogaamiyaha Dawladda Hoose ee metesha ururada iyo hay'adaha bixiya adeegyada dadweynaha ee xaafadda Camden, oo ay ka mid yihiin bilayska iyo adeegyada caafimaadka ee maxaliga ah, iyo ganacsiyada maxaliga ah iyo qaybaha beesha iyo kuwa mutadawuciinta ah.

Gudbinta adeegyada dadweynaha ee ugu wanaagsan ee daboolaya baahiyaha dadka ku nool xaafadda waa qayb ka mid ah sheekada laakiin ma aha iyada oo dhan. Qorshahanina ma aha run ahaantii mid ku saabsan waxa ay qaban karaan hay'adaha dadweynuhu. Dadku way ku saxsanyihiin in ay ka filaan Dawladda Hoose iyo hay'adaha la shaqeeyaba in ay la tashadaan. U jiheeyaan isla markaana ay bixiyaan hogaamin caddaan ah. Laakiin qof kastaaba waa ka masuul sida ugu badan ee caqligalka ah in uu caawimo uga geysto in la oofiyo ballanqaadyada lagu sharxay qorshahan.

### Wadatashi

Wadatashiga ku saabsan Wada Jirka Camden waxa uu dhacay intii u dhaxaysay bilihii September iyo November 2006. in ka badan 1200  oo qof ayaa si firfircoon uga qayb qaatay wada tashiga waxaana aanu dadka ka helnay 263 jawaabood oo qoraal iyo email ah, oo ay ka mid yihiin 91 ay soo direen carruur iyo dad ay da'doodu yartahay. Waxa iyana jirey 51 jawaabood oo ka yimi ururada iyo 374 qof oo ka soo qayb galay kulamada ay hogaaminayeen kawnsilarada ee lagu qabtay waaxaha.

Kulamada waaxaha waxa dheeraa oo aanu qabanay dhacdooyin badan oo kala duwan oo wadatashi ah, oo ay ka mid yihiin kulamo gaar ah oo lala

yeeshay kooxaha gaarka ah ee ah dadka deggan, kulamo ku saabsan horumarinta iyo arrimaha ganacsiga, shaqo lala sameeyey dugsiyada iyo golaha degmada oo lagu qabtay Dugsiga Haverstock School. Waxa aad wax badan ka ogaan kartaa websaytka ah www.camdentogether.org.uk. Saytkani waxa kale oo uu noqon doonaa iliil joogto ah oo ah macluumaad ku saabsan Qorshaha horumarinta beesha ee cusub ee xaafadda Camden.

Qaar ka mid ah farriimaha gaar ahaan si xooggan uga soo baxay wadatashiga waxa ka mid ahaa waxyaabaha soo socda:

- **Guryaha**
  Dad aad u badan ayaa u malaynaya in guryaha xaafaddu ay tahay arrin aad muhiim u ah. Gaar ahaan, dadku waxa ay dareensanaayeen in aanay xaafadda ka jirin guryo ku filan kuwaas oo ah guryo la awoodi karo ama ku habboon baahiyahooda.

- **Maandooriyeyaasha iyo dembiga kale**
  Dadku waxa ay dareensanaayeen in isticmaalka iyo iibka muuqda ee maandooriyeyaasha ee xaafadda gudaheedu ay si xun wax ugu dhintay tayada nolosha. Guud ahaan, wax ka qabashada arrimaha amniga iyo dembiyadu waxa ay u ahaayeen qaar mudnaanta sare u leh dadka deggan si loo horumariyo xaafadda Camden mustaqbalka.

- **Dukaamada iyo ganacsiyada maxaliga ah iyo kuwa madaxabannaan**
  Dadku waxa ay qiimaynayeen qaar badan oo ka mid ah ganacsiyada maxaliga ah – gaar ahaan dukaamada madaxabannaan iyo kuwa maxaliga ah – iyo iyaga oo doonayey in la sii wado kala duwanaanshahan.

- **Arrimaha deegaanka**
  Waxa jirtey taageero xoog leh oo ah hab firfircoon oo lagu ilaalinayo deegaanka iyo in wax laga qabto isbeddelka cimilada. Dadku waxa ay doonayeen in iyadu ay u fududaato si ay gacan uga geystaan.

- **Maaraynta kordhitaanka**
  Tiro badan oo ka mid ahayd dadkii soo jawaabay waxa ay dareensanaayeen in ay xaafadda Camden dhibaato kala kulmi doonto in ay maarayso tirada dadka ee sii badanaysa qaarkoodna waxa ay ku doodeen in dadka hadda deggani ay tahay in ay mudnaanta qaataan.

- **Kala duwanaanshaha**
  Waxa jirtey taageero badan oo la taageerayey kala duwanaanshaha xaafadda Camden, gaar ahaan , dad aad u badan ayaa waxa ay jeclaadeen in ay ku dhinac noolaadaan dadka ka soo jeeda meelo kala duwan. Dad badan ayaa waxa ay ku doodeen in ay luqadda Ingiriisidu tahay mid aad muhiim ah si laysugu hayo beesheena kala duwan.

- **Dhiirinta masuuliyadda shakhsiga**

> Dadku waxa ay taageereen fikradda ah in qof kastaa uu yeesho door uu ka ciyaaro ka dhigitaanka xaafadda Camden meel fiican oo lagu noolaado. Qaar badan oo ka mid ah ayaa waxa ay sheegeen in ay ka filayeen Dawladda Hoose hogaamin laakiin waxa kale oo ay aqoonsadeen in ay jirto waxoogay keliya oo ay qaban karto Dawladda Hoose. Waxa kale oo lagu dooday in ay dadku u baahnaayeen taageero iyo dhiirigelin si ay markaas u awoodi karaan in ay laftoodu masuuliyadda qaadaan.

Waxa kale oo jirey farriimo cad cad oo ka yimi, tusaale ahaan, carruurta, dadka ay da'doodu yartahay iyo dadka da'da ah, kuwaas oo ka muuqday qorshaha oo dhan. Farriimaha ka yimi wadatashiga ayaa caawimo ka geystey samaynta ballanqaadyada lagu sharxay qorshahan.

**Sida aynu uga dhigayno Wada Jirka Camden mid dhaca**

Wada Jirka Camden waxa uu sharxayaa aragtida Camden ee sannadka 2012, iyada oo leh mudnaano cad oo aynu u baahanahay in aynu diiradda saarno ayaa ka dhigaya aragtidaas mid dhab ah. Waa qorshe himilo leh sababta oo ah waxa uu wax ka qabanayaa – si toos ah – carqaladaha ugu waaweyn ee inaga hor imanaya si aynu xaafadda Camden uga dhigno xaafadda fursadda.

Dawladda Hoose iyo adeegyada dadweynaha ee kale, Wada Jirka Camden waxa uu jiho u dejin doonaa shaqadeena shanta sanno ee soo socota. Aragtidu waxa ay bixin doontaa macnaha guud ee dhammaan qorsheyaasha iyo istaraatiijadaheena kale, oo ay ka mid tahay qorsheyaasha shuraakada ee muhiimka ah (sida Qorshaha Carruurta iyo Dadka ay Da'doodu Yartahay ee xaafadda Camden) iyo qorsheyaasha ururada gaarka ah (sida Qorshaha Isutagga ee Dawladda Hoose).

Waxa aanu daabici doonaa ahdaafta ugu waaweyn iyo muujiyeyaasha aanu u isticmaali doono in aanu ku cabirno guulaha Heshiishka Aagga Maxaliga ah ee Camden. Kani waxa uu si faahfaahsan u sharxi doonaa horumarinaha gaarka ah ee aynu doonayno in aynu aragno sannad walba iyo waxqabadkeena anaga oo iyaga u eegayna. Waxa kale oo aanu soo saari doonaa warbixin labadii sannoba hal mar loogu talogalay Shuraakada Istaraatiijiga ee Maxaliga ah oo ku saabsan horumarka iyada oo loo eegayo dhammaan ballanqaadyada lagu sharxay qorshahan. Kani waxa uu la socon doonaa sida ballanqaadyada ku qoran qorshahan loo gudbiyey ee ay u gudbiyeen Dawladda Hoose iyo hay'adaha la shaqeeyaa.

Qorshahani kuma saabsana oo keliya waxa ay adeegyada dadweynuhu qaban karaan, laakiin waxa kale oo uu sharxayaa doorka ganacsiyada, beelaha iyo ashkhaasta. Waxa aanu daabici doonaa macluumaad ku saabsan sida ay kooxahani gacan uga geysanayaan dhab ka dhigitaanka aragtida.

Waa muhiim in la fahmo lalana socdo saamaynta uu qorshahan beeshu ku yeelan karo qaybaha kala duwan ee nolosha ee xaafadda. Tani waa si hubaal looga dhigo in aanu qorshuhu saamayn takoorid ama kala soocitaan ah ku

yeelanin kooxo gaar ah, ama aanu dhibaato u geysanayn deegaanka ama caafimaadka dadka ku nool xaafadda. Sababtan awgeed, ayaa qorshaha beesha lagu samayn doonaa qiimayn ah sida uu u saamaynayo caafimaadka, deegaanka, kala duwanaanshaha iyo sinnaanta. Qiimaynta saamayntu waxa lagu muujin doonaa laguna cusboonaysiin doonaa warbixinta horumarka ee labadii sannoba hal marka ah ee ku saabsan qorshaha beesha.

**Muhimadaha Wada Jirka Camden**

Waxa jira laba muhimadood ama qiime oo waaweyn oo taageera habka Wada Jirka Camden:

- Qof kasta oo inaga mid ah shakhsi ahaan waxa uu u baahanyahay in uu **masuuliyad iska saaro oo qaado tallaabooyinkeena aynu qaadno ah**. Masuuliyadda shakhsigu waxa ay horumarisaa tayada nolosheena waxayna hubaal ka dhigtaa in ay xaafadda Camden noqoto meel fiican oo lagu noolaado. Tan macnaheedu waxa weeye ilaalinta caafimaadkeena, ixtiraamidda dadka kale iyo ilaalinta deegaanteena.

- Waxa kale oo aynu u baahanahay in aynu u **wada shaqayno,** sidii muwaadiniin ahaan si firfircoon gacan uga geysanaya beesheena maxaliga ah iyo sidii ururo ahaanba – oo ay ka mid yihiin ganacsiyada maxaliga ah, qaybta dadweynaha iyo qaybta beesha iyo ta mutadawuca ah – si aynu caawimo uga geysano xallinta carqaladaha ugu waaweyn ee xaafadda. Wada shaqayntu waxa ay xoojisaa oo ay dhiirisaa dareenka beeleed.

**Shuraakada Istaraatiijiga ee Maxaliga ah**

Shuraakada Istaraatiijiga ee Maxaliga ah ee Camden (LSP) waxa hogaamiya dawladda hoose waxayna ku lug leedahay adeegyada caafimaadka, bilayska, iyo adeegyada kale ee dadweynaha, ganacsiyada waaweyn iyo kuwa yaryar, iyo wakiilada ka kala socda qaybaha mutadawuciinta, beesha iyo qaybaha kaleba. LSP waxa ay ujeeedadeedu tahay oo ay doonaysaa in ay horumariso tayada nolosha ee dhammaan dadka ku nool, ka shaqeeya ama soo booqda xaafadda. Xubin ka noqoshadeeda hoos ayaa lagu sharxay:

- Hogaamiyaha Dawladda Hoose oo ah Guddoomiyaha LSP, iyo Hogaamiye Ku Xigeenka Dawladda Hoose.
- Fuliyeyaasha Dawladda Hoose iyo Hay'adda Daryeelka Bilowga ah.
- Abbaanduuleyaasha Xaafadda ee Bilayska iyo Adeegyada Dab Damiska.
- Shebekedda Awood Siinta Beesha ee Camden, oo metesha qaybta beesha iyo mutadawuca ee xaafadda ka jira.
- Xaffiiska shaqada (Jobcentreplus), Ururka Guryaha ee xaafadda Camden iyo Golaha Iskaashatooyinka, Golaha Waxbarashada iyo Xirfadaha, Guddoomiyeyaasha Wadajirka ee Guddiyada Dugsiga, Ururka Camden Town Unlimited, Shuraakada Holborn, Guryaha iyo Istayshinada Qaaradda iyo London, iyo Jaamacadda University College London.

LSP waxa ay ogolaatay aragtida iyo ballanqaadyada ku yaalla qorshaha wayna la socon doontaa hirgelintooda. Tan waxa ku jiri doona xubnaha SLP oo sii wadaya ballanqaadyada isla markaana hubaal ka dhigaya in LSP lafteedu ay ku habboontahay ujeedada. Si kastaba ha ahaatee, masuuliyadda sharci ee qorshaha waxa iska leh Dawladda Hoose iyo afar iiyo kontonka kawnsilar ee ay soo doorteen dadka codeeyey ee ku nool xaafadda Camden.

**Kharashka Qaybta Dadweynaha ee Camden**

Sannad walba xaafadda Camden waxa jira maalgelin weyn iyo kharash garayn ay sameeyaan adeegyada dadweynuhu maxali ahaan-,gobol ahaan- iyo qaran ahaanba. LSP way aqoonsantahay muhimadda ay leedahay adeegyada dadweynaha oo wada shaqaynaya si aynu ugu gudbino dadka cashuurta bixiya wax lacagta u qalma. Sidaas darteed ayaa waxa aanu dhisaynaa sawir ah wadarta kharash garaynta qaybta dadweynaha ee xaafaddu.

Jadwalka hoose waxa uu sharxayaa qaar ka mid ah meelaha ugu muhiimsan ee kharash garaynta ee xaafadda. Tirooyinku waxa ay u taaganyihiin kharsh garaynta isla xaafadda Camden gudaheeda. Qaar badan oo ka mid ah adeegyadani faa'iido uma keenaan oo keliya dadka deggan xaafadda Camden ee waxa kale oo ay faa'iido u leeyihiin dadka aan deganayn xaafadda Camden ee ka shaqeeya, wax ka barta soona booqda halkan.

| **Xisaabaha kharashka ee xaafadda Camden ee 2005/06** | |
|---|---|
| **Dawladda Hoose** | |
| Xaafadda Camden[1] | £897,300,000 |
| **Amniga Beesha** | |
| Bilayska (Miisaaniyadda Waaxda Abbaanduulka Hawlgalada ee Xaafadda) | £40,100,000 |
| Bilayska (qiyaasta kharashka dheeraadka ah)* | £54,000,000 |
| Adeegga Xeer Ilaalinta* | £5,800,000 |
| **Dab damiska iyo qorshaynta gurmadka degdegga ah** | |
| Hay'adda Qorshaynta Degdegga iyo Dab Damiska London* | £13,000,000 |
| **Adeegga Caafimaadka Qaranka** | |
| Hay'adda Daryeelka Bilowga ah[2] | £470,890,000 |
| **Gaadiidka** | |
| Gaadiidka London (ee lagu daray miisaaniyadda Dawladda Hoose) | £9,095,000 |
| Gaadiidka London (qiyaasta kharashka dheeraadka ah)* | £125,000,000 |
| **Tacliinta Sare** | |
| Golaha Waxbarashada iyo Xirfadaha[3] | £42,500,000 |
| **Kale ee gobolka** | |
| Hay'adda Horumarinta London* | £11,200,000 |
| Hay'adda Gudaha London (Greater London Authority)* | £2,100,000 |
| **Wasaaradda Shaqada & Bisilka iyo Cashuuraha & Kastamka** | |
| Dheefaha, gunnooyinka, deeqaha cashuurta iyo bisilka[4] | £323,000,000 |

Qaybta beesha iyo mutadawucu waxa kale oo ay si weyn gacan uga geysataa shaqada LSP ee xaafadda iyada oo samaynaysa dibna u maalgashanaysa dakhli, kor u qaadaysa meelgelinta ka imanaysa meelaha kale iyo qiimaha waqtiga mutadawuciinta.

[1] Warbixinta Xisaabaadka ee Camden ee 2005-06. Kharashka Dawladda Hoose waxa uu daboolaa adeegyo badan oo kala duwan laga bilaabo meelgelinta dugsiyada illaa iyo bixinta daryeelka bulshada ee dadka waaweyn & guryaha/dheefaha cashuurta dawladda hoose.

[2] Warbixinta sannadka ee PCT ee Camden ee 2005-06. PCTs waxa ay kaantaroolaan boqolkiiba 80 wadarta miisaaniyadda Adeegga Caafimaadka Qaranka.

**Cutubka Labaad: Aragtida**

Aragtideena guud ee xaafaddu waa in:

| |
|---|
| Xaafadda Camden ay marka uu sannadku yahay 2012 ay noqon doonto xaafadda fursadda |

| | |
|---|---|
| Camden horumarta oo la qabsata islana beddesha tirada dadka ee sii kordhaysa | Dhaqaalaha xaafadda Camden oo xooggan oo qof kastaba ka qayb geliya |
| Waxa aynu heli doonaa siyaabo aynu ula qabsano tirada dadka ku nool xaafadda Camden ee sii kordhaysa inaga oo u ilaalinayna, horumarinayna una kobcinayna deegaankeena inaka iyo jiilalka mustaqbalka. | Dhaqaalaha xaafadda Camden waxa uu noqon doonaa mid xooggan dad badan oo ka mid ah dadka deggan xaafadda Camden gaar ahaan dhalinyarada ayaana heli doona xirfadaha, waxbarashada iyo tababarka ay kaga qayb qaadanayaan suuqa shaqada. |
| Beesha xaafadda Camden oo isku xidhan halkaas oo ay dadku ku noolyihiin nololo caafimaad leh oo firfircoon | Camden ammaan ah oo ah qayb nashaad leh oo ka mid ah dunideena magaalada |
| Camden waxa ay yeelan doontaa dareen weyn oo beeleed dadkana waxa laga taageeri doonaa in ay noqdaan muwaadiniin firfircoon oo saamayn ku yeesha go'aamada maxaliga ah isla markaana ku noolaada nololo caafimaad leh. | Xaafadda Camden waxa ay noqon doontaa meel ammaan ah oo ay dadka xaafadda ku nooli ka faa'iidaan fursadaha dhaqan iyo madadaalo ee ay ka midka yihiin ciyaaraha Olombigga ee magaalada London. |

[3] Tiradu waa qiyaas ku salaysan macluumaad maxali ah oo faahfaahsan.

[*] tirooyinku waa qiyaas ku salaysan xisaabaadka gobolka (heerka London) oo loo qaybiyey tirada xaafadaha London. Miisaaniyadda Hay'adda Gudaha London gooni ayaa looga siiyaa afarteeda hay'adood: Bilayska, Dab Damiska, iyo LDA

[4] Waxa ay ku salaysanyihiin istaatistikada DWP iyo HMRC. Waxa ku jira Gunnada Naafada, Dheefta Dadka aan Shaqayn karin / Gunnada Naafada Aadka ah, Taageerada Dakhliga,Gunnada Shaqo Doonka, Deeqda Bisilka, Bisilka Qaranka, Gunnada Ilaalinta, Deeqda Cashuurta Dadka Shaqeeya, Deeqda Cashuurta Ilmaha, Dheefta Carruurta.

**Cutubka saddexaad: Xaqiiqooyinka xaafadda Camden**

Waa muhiim in aynu ku dhisno qorsheyaasheena mustaqbalka fahamka xaafadda ee maanta iyo weliba sida ay caqligalka u tahay in ay isu beddesho muddo kadib.

- Camden waa xaafad magaalada London ka mid ah oo nashaad ah oo ay dadka ku nooli kala duwanyihiin dad badanina ay soo degayaan kana guurayaan xaafadda sannad walba.
- Camden waxa ku nool tiro dad ah oo aad u saraysa oo ay da'doodu u dhaxayso 20 iyo 44 sanno.
- Waxa aynu ognahay in dadweynaha ku nool xaafaddeenu uu ahaan doono mid ay da'diisu yartahay, iyada oo dadka intiisa badani ay ahaan doonaan dad ay da'doodu ka yartahay konton sanno.
- Dadweynaha ku nool xaafaddeenu waxa laga yaabaa in ay sii kordhaan, illaa iyo boqolkiiba 10% tobanka sanno ee soo socda haddii ay sida ay imika ku socdaan ay u socdaan. Kordhitaankanina waxa laga yaabaa in uu adeegyada maxaliga ah iyo guryaha uu cadaadis dheeraad ah saaro.
- Xaafadda Camden meel uma aha dadka deggan oo keliya, ee illaa iyo rubuc milyan dad ah ayaa maalin walba halkan ka shaqeeya xaafadduna waxa ay soo jiidataa tiro dad ah oo aad u badan oo ah dalxiiseyaal sannad walba.
- Dhaqaalaheenu waa mid xooggan – wuxuuna ku biiriyaa illaa iyo boqolkiiba 1% dhaqaalaha dalka – laakiin dad badan oo maxali ah, gaar ahaan dadka ku nool guryaha bulshada iyo dadka naafada ah iyo kuwa xanuunsanaya ayaan shaqo haysan.
- Xaafadda Camden waxa ay leedahay meelo ka mid ah meelaha ugu qanisan magaalada London iyo qaar ka mid ah meelaha ugu faqiirsan.
- Saddexdii meeloodba meel ka mid ah carruurta ku nool xaafadda Camden ayaa ku nool qoysas ku tiirsan dheefaha uu dalku bixiyo.
- Laakiin afartii qofba saddex ka mid ah ayaa u malaynaya in ay xaafaddoodu leedahay dareen wanaagsan oo beeleed.
- Baahida loo qabo guryo la awoodi karo ayaa aad uga badan inta la hayo oo illaa iyo meel ka mid ah saddex meelood oo ah qoysaska ku nool xaafadda Camden ayaa ku nool guryo cidhiidhi ah oo dadku aad ugu badanyihiin.
- Dembiyada la diiwaangeliyey guud ahaan hoos ayay u dhacayeen laakiin xaafadda Camden waxa haysta dembiyada ka dhaca meelo badan oo ka mid ah magaalada gudaheeda dembiyaduna weli waxyaabaha ugu muhiimsan ee ay ka werwersanyihiin dadweynuhu.
- Xaafadda Camden waxa ku nool tiro dad ah oo aad u badan - 4218 – oo ah dadka isticmaala maandooriyeyaasha ee dhibaato abuurka ah laakiin aad ayay ugu sarraysaa marka loo eego tirada dadka ah ee maandooriyeyaasha isticmaasha ee ku jira barnaamijyo daaweyn ah.
- Illaa iyo kala badh dadka ku nool xaafadda Camden ayaa waxa ay haystaan shahaadooyin ah ugu yaraan shahaado jaamacadeed ama digrii halka ay rubuc dadka ka mid ah haystaan shahaadooyin yar haddii ay haystaanba wax shahaadooyin ah.

- Sannadkii 2006 ayaa waxa xaafadda Camden la geliyey kaalinta toddobaad dalka oo dhan qiimaynta dugsiyadeeda hoose halka ay dugsiyadeeda sare ay gaadheen ama heleen heerkoodii ugu sarreeyey weligeedba ee natiijooyinka GCSE ee giraydhada A* illaa C 55%.
- Illaa iyo boqolkiiba 35% dadweynaha ku nool xaafadda Camden ayaa sigaarka caba marka la barbardhigo boqolkiiba 25% ee Iglan ( England) iyo illaa iyo boqolkiiba 17% dhimashooyinka ka dhaca xaafadda Camden ayaa uu sabab u yahay cabitaanka sigaarku.
- Faraq ayaa u dhexeeya muddada ay raggu noolaadaan ee muddo 11 sanno ah inta u dhaxaysa Hampstead Town iyo St Pancras iyo Somers Town.
- Kaarboonka ay hawada ku sii dayso xaafadda Camden waxa uu u dhigmaa illaa iyo hal milyan iyo badh duulimaad oo ah illaa iyo magaalada New York sannad walba ama illaa iyo sagaal tan qofkii xaafadda degganba.

**Camden horumarta oo la qabsata islana beddesha tirada dadka ee sii kordhaysa**

Xaafadda Camden waxa ka hor imanaya carqalado waaweyn oo ah xagga deegaanka tobanka sanno ee soo socda, oo ay ka mid yihiin tirada dadka oo sii kordhaysa. Maxali ahaan, tirada dadka oo sii korodha waxa uu macnaheedu noqon doonaa dadka oo badan oo ka mid ah dadka deggan, ganacsiyada iyo dadka soo booqanaya oo u baahan doona meel badan oo bannaan oo dhismeyaasha ah, isticmaalidda tamarta oo sii siyaadda iyo baabuurta oo sii badata. Waxa aynu u baahan doonaa in aynu wada shaqayno si aynu u maarayno nidaamada iyo adeegyada bulshada, caafimaadka, dhaqaalaha iyo waxbarashada si aynu u taageerno tirada dadkeena ee sii kordhaysa.

Isbeddelka cimiladu wuu ina saamaynayaa dhammaanteenba waxaana loo baahanyahay in la qaado tallaabo degdeg ah oo wax lagaga qabanayo. Waxa naga go’an oo aanu ku ballanqaadaynaa in aanu ka shaqayno horumarka xaafadda Camden oo la qabsata islana beddesha tirada dadka ee sii kordhaysa anaga oo ilaalinayna, horumarinayna isla markaana kobcinayna deegaankeena.

**U ilaalinaya deegaanka inaka iyo jiilalka mustaqbalka**

Hadafkayagu waa in aynu ka dhigno xaafadda Camden xaafad uu qashinkeeda iyo kaarboonkeedu hooseeyo marka uu sannadku yahay 2012

**Sababta ay arrintani muhiimka ay u tahay**

Isbeddelka cimiladu waa arrin degdeg ah oo mudnaanta ugu sarraysa leh adeegyada dadweynaha ee xaafadda Camden waxa ay ku ballanqaadayaan in ay qabtaan qaybtooda si loo yareeyo kaarboon dhay ogsaydhka hawada lagu sii daayo, oo ah gaasta ugu badan ee sababta isbeddelka cimilada, oo la mid ah ahdaafta qaranka. In ka badan kala badh gaasaska keena isbeddelka cimilada ee xaafadda Camden ay ku sii dayso hawada ayaa waxa ay ka yimaadaan oo ay ka soo baxaan ganacsiyada illaa iyo rubucna waxa sii daaya guryaha. Dhammaanteenba waxa aynu u baahanahay in aynu ka fekerno oo ka fiirsano sida aynu u yarayn karno ama u dhimi karno kaarboonka aynu ku sii dayno hawada ‘raadkeena kaarboonka’.

Laakiin ilaalinta, horumarinta iyo kobcinta deegaanku waa mid ka werwer badan isbeddelka cimilada. Inaga ayayna ina jirtaa dhammaanteenba in aynu hubaal ka dhigno in aynu si caqligal ah u isticmaalno qaniimadeena dabiiciga ah; yarayno, dib u isticmaalno dibna u warshadayno qashinkeena; ilaalino dhirta iyo xayawaanka duur joogta ah; isla markaana aynu yarayno wasakhaynta hawada. Waxa aynu u baahanahay in aynu u fududayno dadka

in ay yareeyaan saamayntooda ay ku leeyihiin deegaanka.

**Waxa illaa iyo hadda la qabtay**

Dhowr sannadood ayaanu si fiican wax uga qabanay yaraynta qashinka iyo dib u warshadaynta. Sannadkii 2006 heerkayaga dib u warshadaynta oo ahaa boqolkiiba 27% ayaa waxa uu ahaa kii ugu sarreeyey ee xaafadaha London gudaheeda ah. Xaafaddu waxa kale oo ay yaraynaysaa heerarka baabuurta badan kaas oo hoos ugu dhacay boqolkiiba 20% laga soo bilaabo illaa iyo sannadkii 1993kii, tusaale ahaan xaddidaadaha lagu soo rogay meelaha baabuurta la dhigto darteed.

Dawladda Hoose deeq ayay siisaa dadka deggan dhammaan noocyada guryaha ah ee kala duwan si loo horumariyo si waxtar leh u isticmaalidda tamarta ee guryahooda waxayna baajiyeen tamarta kulaylinta oo u dhiganta 3,900 oo guri iyada oo la isticmaalayo dahaadhid iyo daaqadaha iyo muraayadaha labada lakab ah guryaha ay hayso.

Dugsiyada ku yaalla xaafadda Camden waxa ay ka caawinayaan carruurta yaryar iyo dadka ay da’doodu yartahay in ay hor kacaan nololo horumar leh, tusaale ahaan, iyada oo laga qayb gelinayo naqshadaynta deegaanka dugsigooda.

Halkan ayay ku qoranyihiin qaar ka mid ah ujeedooyinka gaarka ah ee aanu ku shaqaynayno in aanu gaadhno:

- In aanu ka dhigno guryaha ay leedahay Dawladda Hoose qaar tamarta si waxtar leh u isticmaala oo madhxiya.
- In la kordhiyo qashinka dib loo warshadeeyo ama la dhalan rogo.
- In la yareeyo inta qashin ah ee laga qaaday qof kasta oo ka mid ah dadka deggan.
- In la yareeyo heerka tirada baabuurta.

**Waxa ay dadku noo sheegeen**

Intii uu socday wada tashigu ray’iyo badan ayaanu helnay oo ku saabsan arrimaha deegaanka. Dadkuna waxa ay u malaynayaan in isbeddelka cimiladu yahay arrin muhiim ah waxayna doonayaan in ay doorkooda ka ciyaaraan iyo in Dawladda Hoose iyo hay’adaha kale ee la shaqeeyaa ay maxali ahaan waddada u horkacaan.

Dadku waxa ay doonayaan in ay ganacsiyadu in intii hore ka badan ay ku lug yeeshaan ilaalinta deegaanka. Waa lagu kala qaybsanaa in aynu isticmaalno ganaaxyo iyo abaalmarino, laakiin waxa muhiim ah oo ay dadku doonayaan in ay qof kastaba u fududaato in ay intooda qabtaan.

**Waxa ay Dawladda Hoose iyo hay’adaha kale ee la shaqeeyaa ay qaban doonaan**

- In la yareeyo kaarboonka hawada lagu sii daayo iyo qashinka dhismeyaashooda iyo adeegyada si waafaqsan ahdaafta qaranka.

- In loo fududeeyo dadka deggan iyo ganacsiyada in ay ilaaliyaan deegaanka oo ay ka mid tahay:
    - Iyada oo ay yaraynayaan, dib u isticmaalayaan dibna u warshadaynayaan qashinkooda.
    - Iyaga oo yaraynaya raadkooda kaarboonka ay hawada ku sii daynayaan.

- In ay ku dhiiriyaan dhammaan horumarinaha iyo kordhitaanku in ay noqdaan:
    - Qaar xasaasi ku ah deegaanka, oo ay ka mid yihiin meelo bannaan, dabeecad maxali ah iyo deegaan dabiici ah;
    - Kaarboonka iyo qashinka ugu hooseeya ee caqligalka ah; iyo guud ahaan
    - In la dhiirigeliyo horumarin waarta.

- In ay ogaato sida ay horumarinaha waaweyni hiit iyo tamar ugu dhalin karaan meelaha ku xeeran.

- In la yareeyo wasakhaynta hawada ee ka timaada gaadiidka iyada oo la yaraynayo baabuurta iyo isticmaalka baabuur ka nadiifsan kuwii hore oo ay ku jiraan dhiirinta in ay dadku lugeeyaan oo socdaan, baaskeelado ay ka kaxaystaan isla markaana isticmaalaan gaadiidka dadweynaha.

**Sida ay dadka xaafadda ku nool ee maxaliga ahi ay gacan uga geysan karaan**

- Iyaga oo yareeya ama hoos u dhiga inta tamar iyo biyo ah ee lagu isticmaalo gurigooda.
- Socodka ama lugaynta, kaxaysiga baaskeelad iyo iyaga oo isticmaala gaadiidka dadweynaha, oo ay ku jiraan tegitaanka iyo ka imaatinka dugsiga.
- Iyaga oo yareeya qashinka intii hore in ka badanna dib u warshadeeya.
- Iyaga oo xaafadda gudaheeda ka soo adeegta.
- Iyaga oo meeshii ay caqligal tahay isticmaalla tareenada ee aanay isticmaalin diyaarado – tareenka Yuroistaar (Eurostar) ayaa kambalkeena iman doona laga bilaabo bisha November 2007.
- Haddii aad tahay ganacsi, in aad qaado tallaabo aad ku yaraynayso saamaynta aad ku leedahay deegaanka.

**Si wadajir ah uga wada shaqaynaya si loo maareeyo tirada dadka ee sii kordhaysa**

Hadafkayagu waa in aanu maarayno kordhitaanka si uu si fiican ugu shaqeeyo xaafadda Camden.

**Sababta ay arrintanu u tahay mid muhiim ah**

Tirada dadweynaha ku nool xaafadda Camden ayaa waxa la filayaa in ay kor u kacdo boqolkiiba 10% inta u dhaxaysa hadda iyo marka uu sannadku yahay 2016 haddii sida ay imika u socoto ay u sii socoto. Qof kastaaba sooma dhoweynayo arrintan. Illaa iyo boqolkiiba 30% oo ah qoysaska hadda deggan xaafadda Camden ayaa ah qaar cidhiidhi ku nool oo dadku guriga ka badanyihiin, marka la barbar dhigo boqolkiiba 7% da dalka oo dhan ama qaranka, baahida loo qabo nooc kasta oo ah guryaha bulshada la siiyo, guryaha dadka da'da ah lagu taageero iyo adeegyada dadka deggan ayaa aad uga badan inta la hayo. Tanina waxa ay saamaysaa caafimaadka qoysaska iyo badbaadadooda waxayna saamaysaa oo ay saamayn ku leedahay guulaha iyo waxbarashada dadka ay da'doodu yartahay.

In ay helaan guryo la awoodi karaa mudnaanta sare ayay u leedahay dadka deggan xaafadda, oo ay ka mid yihiin dadka uu dakhligoodu iska caadiga yahay. Waxaynu u baahanahay in aynu wax u qorshayno xitaa tirada dadka oo intan ka badan si ay dhismeyaasheena iyo adeegyadeena iyo guryaheenuba ay u daboolaan baahiyaha sii kordhaaya carqaladanna u xalliyaan.

**Waxa illaa iyo hadda la qabtay**

Dib u horumarinta King's Cross ayaa waxa ay keeni doontaa 1700 oo guri oo cusub, oo ay ka mid yihiin 750 oo ah guryo la awoodi karo iyo 650 oo ah unugyada ardayda. Laakiin guryaha cusub badankoodu waxa ay ka iman doonaa dib u horumarinta dhismeyaasha iyo goobaha hadda jira. Goobaha hadda jira waxa haddaba dib loogu horumariyey 'horumarinta isticmaalka isku dhafan' – tusaale ahaan guryaha iyo ganacsiyada – iyo guryaha uu xajmigoodu ku habboonyahay qoyska.

Dawladda Hoose waxa ay ka taageertaa dadka in ay u guuraan guryo ka yaryar kuwa ay hadda ku jiraan waxayna u samaysay guryo lagu taageero carruurta ka tegeysa meelihii lagu daryeeli jirey iyo dhalinyarada dayacan. Si loo cusboonaysiiyo guryaha ay leedahay Dawladda Hoose ee ay hayso ayaa waxa la sameeyey qorsheyaal lagu xidhay shaqo ballaadhan oo ah dib u soo noolayn oo diiradda saaraysa meelaha wanaagsan. Istaytka Chalcots ee ku yaalla Swiss Cottage waxa hadda ka jira £144 milyan oo ah Qorshaha Maalgelinta ee Sida Gaarka ah loo leeyahay. Dawladda Hoose waxa kale oo ay eegaysaa dadka ku jira guryo intay u baahanyihiin ka weyn iyo dadka ku jira guryo cidhiidhi ku ah oo ka yar baahiyahooda si ay si fiican ugu isticmaasho guryaha ay leedahay Dawladda Hoose ee ay hayso hadda.

Halkan ayay ku qoranyihiin qaar ka mid ah ujeedooyinka gaarka ah ee aanu ku shaqaynayno in aanu gaadhno:

- In aanu kordhino oo siyaadino bixinta guryaha la awoodi karo guryaha dadka lagu taageerona ka dhigno mdi qof kastaba si fiican ugu shaqeeya.
- In aanu horumarino tayada iyo helitaanka guryaha bulshada loogu

talogalay.

- Ku soo celinta guryaha hadda bannaan qaar la isticmaalo.
- Ka hortegidda guri beelka.

**Waxa ay dadku noo sheegeen**

Guryaha ayaa waxa ay ahaayeen mid ka mid ah arrimihii ugu badnaa ee lagu soo qaaday wadatashiga. Dad badan ayaa waxa ay ka werwersanaayeen tirada dadka ee sii kordhaysa, gaar ahaan helitaan la'aanta guryo la awoodi karo iyo baahida loo qabo guryo ku habboon qoyska oo intan imika ka badan. Qaar ka mid ah dadka ayaa waxa aanay doonayn in aaggooda laga dhiso wax horumarin ah qaar kalena waxa ay doonayeen in ay dadka hadda xaafadda deggani mudnaanta ka yeeshaan dadka cusub ee soo degaya.

**Waxa ay Dawladda Hoose iyo hay'adaha kale ee la shaqeeyaa ay qaban doonaan**

- In ay ka shaqeeyaan in ay daboolaan carqaladaha xagga guryaha ee xaafadda ee dhammaan noocyada guryaha marka loo eego xagga helitaanka, awooditaanka iyo isku dhafka xajmiyada guryaha, oo ay ka mid yihiin qorshaynta siyaasadaha Shuruucda Horumarinta Maxaliga ah ee soo socota ee Dawladda Hoose.

- In ay hubaal ka dhigaan in dhammaan horumarinuhu ay yihiin qaar ay tayadoodu sarrayso, waara si xasaasi ahna loo sameeyey, oo leh isticmaalada ku habboon ee isku dhafka ah, isla markaana ay taageereen qaab dhismeedyada bulshada iyo dhaqaaluhu oo ay ku jiraan qalabyada shaqada, xarumaha caafimaadka,madadaalada, iibinta, beesha iyo waxbarashada iyo qubitaanka qashinku.

- In ay kala shaqeeyaan dadka deggan in kor loo qaado heerka guryaha bulshada ee xaafadda oo dhan isla markaana dib loo soo nooleeyo istaytyada.

- In lala sameeyo shuraako ay hogaaminayso Dawladda Hoose Hantiileyaasha Bulshada ee Diiwaangashan iyo ha'adaha kale ee doorka ka ciyaara xagga guryaha si si wadajir ah wax looga qabto helitaanka guryaha iyo arrimaha la xidhiidha ee sida amniga beesha iyo si waxtar leh u isticmaalidda tamarta.

**Sida ay dadka xaafadda ku nool ee maxaliga ahi ay gacan uga geysan karaan**

- In ay isticmaalaan adeegyada maxaliga ah, iyo qalabyada xaafadaha kale iyo beesha.
- In ay ka fiirsadaan in ay kireeyaan qol aanay u baahnayn oo dheeraad ah ama u guuraan guri kan ay hadda ku jiraan ka yar haddii, tusaale

ahaan, duruufaha qoyskaagu ay isbeddelaan.

- In ay noqdaan qaar ka fiirsada guryaha laga yaabo in ay ku yaalliin meel ka baxsan xaafadda.
- Haddii aad tahay qof hantiile ah oo guri leh, dib uga dhigitaanka gurigaaga bannaan mid la isticmaalo.

## Dhaqaalaha xaafadda Camden oo xooggan oo qof kastaba ka qayb geliya

Qaybtani waxa ay ku saabsantahay dhaqaalaha xaafadda Camden iyo waxa laga qaban karo si hubaal looga dhigo in ay ganacsiyadu uga shaqeeyaan si waxtar leh horumarna leh xaafadda gudaheeda. Waxa kale oo ay ku saabsantahay dadka ku nool xaafadda iyo sida aynu hubaasha uga dhigi karno in ay helaan fursad ay ku helaan shaqo, haddii ay tahay xaafadda Camden gudaheeda ama meel kaleba.

Dad badan ayaa xaafadda u yimaada si ay uga shaqeeyaan, taas oo saamaysa suuqa shaqada ee maxaliga ah, waxaana jira xoogag dhaqaale – duni, qaran iyo gobol – oo ka baxsan kaantaroolkeena. Laakiin waxa jira tallaabooyin aynu qaadi karno maxali ahaan si aynu u dhiirigelino una taageerno ganacsiyada ka jira xaafadda iyo in aynu siyaadino oo kor u qaadno tirada dadka maxaliga ah ee shaqeeya. Qayb tan ka mid ahi waa in hubaal aynu ka dhigno in ay carruurta iyo dadka ay da'doodu yartahay ay helaan waxbarasho ay tayadeedu sarrayso iyo in ay iyaga iyo dadka waaweyniba ka faa'iidaystaan fursadaha waxbarashada ama tacliinta sare, tababarka iyo shaqooyinka.

### Dhaqaalaha xaafadda oo xooggan

Hadafkayagu waa in aanu ka dhigno xaafadda Camden meel u wanaagsan ganacsiyada isla markaana aanu kor u qaadno dhaqdhaqaaqa ganacsiga maxaliga ah

**Sababta ay arrintani muhiimka ay u tahay**

Xaafadda Camden waxa ay haddaba leedahay dhaqaale uu wax soo saarkiisu sarreeyo oo ku biiriya illaa iyo boqolkiiba 1% wax soo saarka dalka (GDP) laakiin sannadihii la soo dhaafay tirada ganacsiyadu hoos ayay u dhaceen. Dhaqdhaqaaqa dhaqaalaha xaafadda Camden badankiisu waxa weeye "dhaqaalaha aqoonta" oo ay ka mid yihiin jaamacadaha, warbaahinta iyo warshadaha xirfadaha. Qaybta caafimaadka ayaa iyana ah shaqaaleeye weyn oo maxali ah waxa kale oo aanu leenahay ganacsiyada maaliyadda iyo sharciga.

Dhaqaale maxali ah oo xoogganí waa mid muhiim ah oo gacan ka geysta tayada nolosha ee abuuritaanka shaqo, dakhliga uu soo geliyo dadka iyo waxa uu ku soo biiriyo adeegyada dadweynaha ee maxaliga ah. Sidaas darteed aad ayay muhiim inoogu tahay in aynu u horumarino Camden sidii goob ganacsi – sidii meel laga bilaabo ganacsi cusub iyo sidii meel soo dhoweysa maalgelinta soo gelaysa. Xidhiidhka xooggan ee ka dhexeeya koritaanka dhaqaalaha iyo qorshaynta magaalooyinka ayaa iyagana la aqoonsaday oo lagaga hadlay hoos iyo qaybta koritaanka ama kordhitaanka.

**Waxa illaa iyo hadda la qabtay**

Ganacsiyada maxaliga ahi waxa ay ku lug leeyihiin shuraakooyin badan oo ka caawiya iyaga in ay la wada shaqeeyaan, beesha iyo adeegyada maxaliga ah. Kuwan waxa ka mid ah Degmooyinka Horumarinta Ganacsiga ee ku yaalla Holborn iyo Camden Town, shuraakooyinkuna waxay diiradda saareen Kilburn iyo haweenka ganacsiga ku jira. Shuraakada Ganacsiga Waxbarashada waxa uu bixiyaa xidhiidh ka dhexeeya dugsiyada iyo ganacsiyada.

Halkan ayay ku qoranyihiin qaar ka mid ah ujeedooyinka gaarka ah ee aanu ku shaqaynayno in aanu gaadhno:

- In aanu siyaadino dhaqdhaqaaqa ganacsiyada ay dadku leeyihiin ee aagga mudnaanta ee xaafadda.
- In aanu yarayno heerka kicitaanka ee ganacsiga iyo in aanu siyaadino tirada guud ee ganacsiyada xaafadda ku yaalla.
- In aanu siyaadino fursadaha ay ganacsiyo ku bilaabayaan dadka madow iyo kuwa kooxaha dadyowga laga tirada badanyahay iyo haweenka ku nool aagga mudnaantu.
- In aanu kor u qaadno tirada dadka naafada ah iyo dadka ay haystaan dhibaatooyin xagga caafimaadka maanka ah ee shaqooyin gelaya ee wadaya shaqooyin ay mushahar ka qaadanayaan.
- In aanu la shaqayno ganacsiyada xaafadda Camden si aanu uga caawino dhalinyarada in ay wax ka bartaan dunida shaqada iyo ganacsiga.

**Waxa ay dadku noo sheegeen**

Dadku waxa ay sheegeen in ay qiimeeyaan ganacsiyada madaxabannaan ee maxaliga ah gaar ahaan dukaamada. Ganacsiyadu waxa ay noo sheegeen in arrimaha ay ka midka yihiin nidaamka qorshaynta iyo dembigu ay noqon karaan waxyaabo u diida in ay ka furaan xaafadda Camden.

**Waxa ay Dawladda Hoose iyo hay'adaha kale ee la shaqeeyaa ay qaban doonaan**

- In ay yareeyaan shuruucda iyo nidaamada aan daruuriga ahayn ee ganacsiyada, gaar ahaan in la qaato hab ku salaysan khatarta ee kormeerka dawladda hoose iyo nidaamada sharciga.

- In la baadho oo la ogaado saamaynta ay meelaha baabuurta la dhigto, qorshaynta, shuruucda iyo adeegyada kale ee sharciga ahi ku leeyihiin ganacsiyada, gaar ahaan dukaamada maxaliga ah ee madaxabannaan.

- In loo xayeysiiyo xaafadda Camden in ay tahay meel ku habboon oo u wanagsan ganacsiga, tusaale ahaan Shuruucda Horumarinta Maxaliga

ah ee soo socda.

- In dib u eegis lagu sameeyo tusaalaha Degmada Horumarinta Ganacsiga ee ka dhinac jirta hababka kale ee maamulitaanka badhtamaha suuqa si baadhitaan loogu sameeyo sida uu wax ugu soo biirin karo qaybaha kale ee xaafadda.

- In la taageero ganacsadeyaasha cusub iyo kuwii hore u jiray inta lagu jiro bilowga ama bilaabitaanka.

- In laga shaqeeyo sii waditaanka adeegyada dhaqaale ee maxaliga ah ee hadda jira sida xaffiisyada boosaha iyo mishiinada lacagta ee ATMs.

**Sida ay dadka xaafadda ku nool ee maxaliga ahi ay gacan uga geysan karaan**

- In ay ku taageeraan dukaamada maxaliga ah qorshaha kaadhka ballanqaadka si ay uga iibsadaan alaabada iyo adeegyada isla xaafadda gudaheeda.
- In aad weydiisataan talo haddii aydun ka fekeraysaan in aydun samaysaan oo bilowdaan ganacsi aydun iska leedihiin.
- Haddii aad tihiin cid loo shaqeeyo oo maxali ah, in aad u abuurtaan fursado intii hore ka badan dadka xaafadda ee maxaliga ah.
- In dhammaan ganacsiyadu ay ku lug yeeshaan oo ka qayb qaataan beelaha iyo meelaha ay ganacsiga ka sameeyaan.

**Kor u qaadida helitaanka xirfadaha, waxbarashada, tababarka iyo shaqooyinka**

Hadafkayagu waa in aanu ka caawino dad badan oo ku nool xaafadda Camden in ay ka qayb qaataan waxbarashada, tababarka iyo shaqada

**Sababta ay arrintani muhiimka ay u tahay**

Xaafadda Camden waxa ay leedahay dhaqaale maxali ah oo xooggan, ballaadhan oo u soo bandhigi kara laba shaqo qof kasta oo ka mid ah dadka xaafadda deggan oo ku jira da’dii shaqada iyo shaqaale shahaadooyin aad u sarreeya haysta oo maxali ah. Laakiin, iyada oo ay sidaas tahay ayaa hadana ay xaafaddu leedahay heerar aad u sarreeya oo ah dadka aan shaqo haysan ee ku tiirsan dheefaha uu dalku bixiyo. Dadka deggan xaafaddeena qaar ka mid ah ayaa waxa ay shaqada ka maqnaayeen muddo aad u dheer dadka ay da’doodu u dhaxayso 16 illaa iyo 18 sannadood ee dhalinyarada ahina dhammaantood kama qayb qaadanayaan waxbarashada, tababar ama shaqo.

Wax ka qabashada kala soocitaankan dhaqaale ayaa muhiim ah haddii dadka deggan xaafadan Camden ay doonayaan in ay horumariyaan tayada noloshooda intii hore in ka badana ay gacan uga geystaan. Dad aad u badan ayay tani lug ku yeelan doontaa in ay helaan oo yeeshaan xirfadaha aasaasiga ah ama tababar xagga luqada af Ingiriisida ah. Dadka ay da'doodu yartahay iyo carruurta ku nool xaafadda Camden waxa ay u baahanyihiin in ay helaan koorsooyin badan oo kala duwan oo ah qaar tacliimeed iyo shaqoba si kor loogu qaado guulaha guud ahaaneed isla markaana kor loogu qaado doorashooyinka shaqo. Guud ahaan, waxa aynu u baahanahay in aynu ka dhigno dadka maxaliga ah ee xaafadda ku nool qaar la shaqaalayn karo, si ay uga qayb qaadan karaan fursadaha shaqo ee ka jira xaafadda.

**Waxa illaa iyo hadda la qabtay**

Waxa jira barnaamijyo xirfadeed oo badan oo kala duwan iyo fursadaha waxbarashada beesha oo ka jira xaafadda oo dhan, oo ay ka mid yihiin qaar badan oo ka dhaca maktabadaha ku yaalla xaafadda Camden. Qaybta beesha iyo mutadawuca ayaa iyaguna door muhiim ah ka ciyaara bixinta meelo loo maro shaqo mushahar bixisa.

Xaffiiska shaqada ee The Camden Working ayaa ka taageeray 250 oo ah dadka deggan xaafadda in ay galaan shaqooyin sannadkii la soo dhaafay, waxaana jira xaffiiska shaqada ee Adeegga Caafimaadka Qaranka ee NHS oo ku yaalla Kentish Town. Waxa kale oo jira adeegyo taageero oo kale oo badan oo ka caawiya dadka in ay shaqo helaan. Tusaale ahaan, xaafadda King's Cross, waxa ku taalla xarunta shaqaalaynta oo loogu talogalay dadka ku nool xaafadda ee maxaliga ah si ay u yeeshaan xirfadaha isla markaana ay u helaan shaqooyinka dhismaha la xidhiidha ee ka jira xaafadda.

Xaafadda Camden waxa kale oo ay leedahay saddex kulliyadood oo ah waxbarashada dadka waaweyn – City Lit, the Mary Ward Centre iyo the Working Men's College – kuwaas oo bixiya koorsooyin. Waxa jirta jaamacad bixisa tacliinta sare oo maxali ah oo ah jaamicadda Westminster Kingsway College oo xarunteedii ku taalay Gray's Inn dib u dhisaysa.

Halkan ayay ku qoranyihiin qaar ka mid ah ujeedooyinka gaarka ah ee aanu ku shaqaynayno in aanu gaadhno:

- Kor u qaadidda heerarka afka Ingiriisida, xisaabta iyo sayniska, oo ay ka mid tahay tirada ardayda ah ee helaysa ugu yaraan shan maaddo oo ah shahaadada GCSEs (giraydhada A* illaa iyo C), iyo guul ka gaadhitaanka guud ee waxbarashada dugsiga sare iyo dhammaan qaybaha kale ee waxbarashada.
- Horumarinta ama kor u qaadidda heerka shaqaalaynta ee guud iyo in ay dad aad u yari ku tiirsanaadaan dheefaha uu dalku bixiyo.
- Kor u qaadidda ka qayb qaadashada xirfadaha iyo tababarka ee kooxaha mudnaanta ee ay ka midka yihiin dadka qaata dheefta la siiyo dadka aan shaqan karin iyo waalidiinta kelidood ah.
- Kor u qaadidda tirada dhalinyarada ay da'doodu yartahay ee ay

da'doodu u dhaxayso 16 illaa iyo 18 sanno ee ku jira waxbarasho, shaqo ama tababar.
- Horumarinta tegitaanka dugsiga.

**Waxa ay dadku noo sheegeen**

Dadku waxa ay doonayeen heerar sare oo waxbarasho iyo kor u qaadidda fursadaha xirfadaha iyo tababarka ee loogu talogalay dadka ay da'doodu yartahay. Waxa kale oo ay sheegeen in ay doonayaan fursado loo simanyahay oo ah dhinaca shaqada, tababarka iyo waxbarashada iyo xirfado tababar oo intan ka wanaagsan, oo ay ka mid tahay xirfadaha inta aad nooshahay iyo taageerada luqadda Ingiriisida. Daryeelka carruurta oo la heli karo lana awoodi karo ayaa isagana loo arkayey in uu yahay mid muhiim ah si uu uga caawiyo waalidiinta in ay shaqo helaan.

**Waxa ay Dawladda Hoose iyo hay'adaha kale ee la shaqeeyaa ay qaban doonaan**

- In ay wax ka bedelaan waxbarashada dugsiyada sare ee dugsiyada ku yaalla xaafadda Camden oo dhan oo ay ka mid yihiin dhisitaanka dugsi sare oo cusub.

- In ay ballaadhiyaan inta qof ee ay qaadanayaan iyo bixinta tababarka aasaasiga ah iyo xirfadaha muhiimka ah, waxbarashada qoyska iyo dhigitaanka luqadda afka Ingiriisida.

- In ay dhiirigeliyaan waxbarashada xirfadaha iyo fursadaha kale si hubaal looga dhigo in dadka, oo ay ka mid yihiin dadka ay da'doodu yartahay ay heli karaan shaqo, tacliin sare iyo fursado tababar.

- In ay siyaadiyaan fursadaha ay dadku ku soo gelayaan kuna joogayaan suuqa shaqada, oo ay ka mid yihiin dadka da'da ah, daryeeleyaasha, waalidiinta shaqada ku soo noqonaya, iyo dadka ay horjoogaan carqaladaha kale ee shaqadu, sida naafada, ama xanuun.

- In ay hubaal ka dhigaan in la heli karo daryeelka carruurta oo ay tayadiisu sarayso, lana heli karo isla markaana la awoodi karo.

- In ay inta ugu badan ka dhigaan fursadaha shaqada iyo tababarka ee maxaliga ah, oo ay ka mid yihiin tababarada, ay abuurtay Horumarinta King's Cross, tarreenka the Channel Tunnel Rail Link iyo ciyaaraha Olombiga ee London.

**Sida ay dadka xaafadda ku nool ee maxaliga ahi ay gacan uga geysan karaan**

- In aad hubaal ka dhigtaan in uu ilmahaagu dugsiga tago oo uu yimaado waqtigii laga doonayey halkaas.
- In aydun gashaan koorsooyin tababar, idinka oo wax u baranaya in

aydun shahaadooyin heshaan ama xirfad cusub baratan.

- In aad ku dhiirisaan saaxiibadiin iyo xubnaha qoyska ka midka ah in ay waxbarashadooda horumariyaan, xirfadahooda iyo fursadahooda shaqo.
- In aad noqotaan mutadawuciin idinka oo maraya meesha shaqadiina, sida inaad wax u akhridaan dugsiyada maxaliga ah ee xaafadda.

**Beesha xaafadda Camden oo isku xidhan halkaas oo ay dadku ku noolyihiin nololo caafimaad leh oo firfircoon**

Waxa aynu dhammaanteenba doonaynaa in aynu ku noolaano kana shaqayno meel aynu dareensanahay in ay tahay gurigeenii. Qof kastaana wuu ka faa'iidaa in uu ku noolaado meel ay dadku is aaminaan isna ixtiraamaan. Ma aha in uu qof kastaaba noqdo saaxiibkaaga ugu wanaagsan, laakiin waa abuuritaanka xidhiidho ku filan si loo helo dareen bulsho.

Waa muhiim in ay dadku helaan fursad ay gacan kaga geystaan bulshada inteeda kale iyaga oo ku tabarucaya door firfircoonna ka ciyaaraya dimoqoraadiyada maxaliga ah. Qaybtani waxa ay ku saabsantahay sida looga dhigo xaafadda Camden meel leh beelo xooggan oo isku xidhan iyo muwaadiniin firfircoon oo ku nool nololo caafimaad leh.

**Ka caawinaya dadka in ay qayb firfircoon ka qaataan beelaha maxaliga ah ee xooggan**

Hadafkayagu waa in aanu xoojino dareenka beeleed dadka aanu siino fursad intii hore ka badan oo ay qayb firfircoon kaga qaataan nolosha maxaliga ah.

**Sababta ay arrintani muhiimka ay u tahay**

Nolol beeleed xooggan, ixtiraam leh iyo nashaad dhammaanteenba muhiim ayay inoo tahay dad ahaan ama shakhsi ahaan iyo dimoqoraadiyadda maxaliga ahba. Dhammaanteenba waynu ka faa'iidaynaa dareen beeleed oo ka weyn go'aamaduna way ka wanaagsanyihiin haddii ay yihiin qaar ku salaysan baahiyaha dadka iyo khibradda xaafadda.

Si loo gaadho dareenkan beeleed, xuquuqaha qof kastaaba waxa ay u baahanyihiin in la qiimeeyo lana ixtiraamo. Way caawisaa haddii aynu dhammaanteenba leenahay xidhiidho ka gudba xuduudaha jaarnimada, diinta, quruunta, iyo qaybaha kale ee aqoonsiga. Dadku waxa kale oo ay u baahanyihiin in ay awoodi karaan in ay qayb firfircoon ka qaataan go'aan gaadhista maxaliga ah iyo qaybta beesha ee xooggan, nashaadka leh isla markaana waarta.

Camden waa xaafad ay dadka ku nooli kala duwanyihiin. Illaa iyo saddexdii meeloodba meel ka mid ah dadka deggan xaafadda ayaa ka soo jeeda beelaha dadka madow iyo kuwa laga tirada badanyahay, 10kii qofba mid ka mid ah ayaa ah Muslim, waxaana jira dad aad u badan oo ah beelaha dadka qaxootiga ah ee cusub oo ay ka mid yihiin Soomaalidu. In ka badan boqolkiiba 90% dadka deggan ayaa sheegay in ay jecelyihiin in ay ku dhex noolaadaan meel dhaqan ahaan sidan u kala duwan. Waxa aynu u baahanahay in aynu dadku deggan ka sii dhex wadno dareen ixtiraam,

isdhexgal iyo beeleed, inta ugu badan ee caqligalka ahna ka caawino in ay noqdaan qaar firfircoon beesheena maxaliga ah dhexdeeda iyo nolosha dimoqoraadiga ah.

**Waxa illaa iyo hadda la qabtay**

Xaafadda Camden waxa ay leedahay qaybta beesha iyo mutaduca maxaliga ah oo nashaad leh oo ka kooban in ka badan 1,500 oo urur, oo badankooda ay maamulaan dad mutadawuciin ahi. Dad badan oo ka mid ah dadka deggan ayaa ah xubno firfircoon oo ka mid ah nolosha beesha maxaliga ah ururada maxaliga ah, ururada, shebekedaha iyo shuraakooyinka, inkasta oo heerarka mutadawuciintu ay yihiin qaar weli ka hooseeya heerka celceliska qaranka. Xaafaddu way ka duwanayd waddadii qaranka ee doorashooyinkii 2006 kadib markii ay kor u kaceen tirada dadka codeeyey doorashooyinkii xaafadda. Aaminaadda dadka ee Dawladda Hoose iyo bilayska iyo meelaha la midka ah ayaa kordhaysa. Dadka degganina waxa ay sheegeen in ay jirto dareen beeleed oo sii kordhaaya xaafaddooda gudaheeda.

Waxa jira goleyaal badan oo kala duwan oo ka shaqeeya in ay taageeraan oo dhiirigeliyaan danaha kooxo gaar ah. Kooxahan waxa ka mid ah ururka Dumarka Isutaga ee Camden, Ragga Isutaga, Kuwa labadaba u taga iyo Golaha Dadka Sinjigooda Bedela iyo Shuraakada Beelaha Diinta ee Camden. Waxa jira kooxaha dadka deggan iyo kuwa kiraystay , shuraakooyinka xaafadaha iyo Golaha Qaxootiga oo ka shaqeeya ka qayb gelinta beelaha qaxootiga ah. Waxbarashada iyo muwaadinnimada ayaa lagu bixiyaa dhammaan dugsiyadayada dhismeyaasha dugsiguna waxa ay noqonayaan qaar u bannaan beesha wixii ka baxsan saacadaha uu dugsigu furanyahay. Dhalinyarada ayaa iyaguna ka qayb qaadanaya goleyaasha dugsiga iyo Baarlamaanka Dhalinyarada ee UK.

Halkan ayay ku qoranyihiin qaar ka mid ah ujeedooyinka gaarka ah ee aanu ku shaqaynayno in aanu gaadhno:

- Dad intii hore ka badan oo ku tabaruca ugu yaraan laba saacadood toddobaadkiiba.
- Dadka deggan oo dareensan in ay saamayn ku yeelan karaan go’aamada saamaynaya aaggooda maxaliga ah.
- Dad intii hore ka badan oo dareensan in uu aaggooda maxaliga ahi yahay meel ay ku wada noolaan karaan dadka ka yimi meelo kala duwani.
- Dadka deggan oo dareensan dareen weyn oo ah ku xidhnaanta xaafadda Camden.
- Dad intii hore ka badan oo codeeya doorashooyinka.

**Waxa ay dadku noo sheegeen**

Dadku waxa ay muujiyeen taageero badan oo ay u hayaan qof kasta oo door ka ciyaaraya in uu ka dhigo xaafadda Camden meel fiican oo lagu noolaado. Dadku waxa kale oo ay doonayeen in ay saamayn weyn ku yeeshaan

go’aamada maxaliga ah iyo in uu halkaas ka jiro nooc ah gole dhalinyaro. Dadku waxa kale oo ay noo sheegeen in ay tahay in uu qof kastaaba kari karo in uu ka qayb qaato ee aanay ahayn oo keliya dadka laga tirada badanyahay. Waxa kale oo naloo sheegay in luqadda Ingiriisidu ay aad muhiim u tahay si la isugu hayo beesheena kala duwan iyo in kala duwanaanshaha xagga dhaqanka loo baahanyahay in la aqoonsado isla marka la dhiirigelinayo fahamka.

**Waxa ay Dawladda Hoose iyo hay’adaha kale ee la shaqeeyaa ay qaban doonaan**

- In ay go’aan gaadhista ku soo dhoweyso dadka deggan iyada oo ay u soo marinayaan goleyaasha aagga ee ka jira xaafadda oo dhan halkaas oo ay dadku saamayn ku yeelan karaan go’aamada iyo adeegyada dadweynaha ee arrimo badan oo maxali ah.

- In ay siyaadiyaan mutadawucnimada xaafadda Camden gudaheeda oo la gaadhsiiyo in ka badan celceliska heerka qaranka, iyo in ay ilaaliyaan iscaawinta beesha iyo in aanu kor u qaadno fursadaha isdhexgalka.

- In ay sameeyaan Golaha Talobixinta Ishaysashada Beesha ee cusub si looga dhiirigeliyo beelo ishaysta oo qani ah xaafadda gudaheeda.

- In ay horumariyaan helitaanka goobaha dadweynaha iyo beesha iyo dhismeyaasha si loo fududeeyo isdhexgal weyn oo ka dhexeeya beelaha kala duwan.

- In ay soo dhexgeliyaan beelaha cusub, ee ay ka midka yihiin beelaha qaxootiga ahi oo lagu soo daro beelaha maxaliga ah iyo nolosha dimoqoraadiga ah.

- In la sameeyo Gole Dhalinyaro si loo dhiirigeliyo ka qayb qaadashada dhalinyarada ee nolosha shicibka iyo in la ogaado doorashooyinka carruurta yaryar.

**Sida ay dadka xaafadda ku nool ee maxaliga ahi ay gacan uga geysan karaan**

- Iyaga oo mutadawuciin noqda, ama ku biiraya koox maxali ah, adeeg ama bulsho kuna dhiirinaya iyaga in ay gaadhaan dhammaan qaybaha kale ee beesha.
- Iyaga oo codeeya doorashooyinka maxaliga ah, London, qaranka iyo kuwa Yurub kana qayb qaata xisbiyada siyaasadda.
- Adiga oo aragtidaada u gudbiya kawnsilarka xaafaddaada ama Xubinta Baarlamaanka ee xaafaddaada MP ku saabsan arrimaha adiga muhiimka kuu ah.
- Adiga oo la hadla dadka jaarkaaga ah.

**Horumarinta badbaadada iyo caafimaadka xaafadda oo dhan**

Hadafkayagu waa in aanu hubaal ka dhigno in caafimaadka iyo badbaadada dhammaan dadka deggan xaafadda Camden ay horumaraan.

**Sababta ay arrintani muhiimka ay u tahay**

Cunsuro badan ayaa saameeya caafimaadkeena iyo fursadda xanuunka. Qaar badan oo kuwan ka mid ahna waxa saamayn kara adeegyada dadweynaha, sida deegaanka iyo xaaladaha guryaha aynu ku jirno. Adeegga Caafimaadka Qaranka NHS ayaa masuul ka ah bixinta adeegyo lagu daawaynayo xanuuno badan. Si kastaba ha ahaatee, qaybaha kale ee caafimaadka waxa keliya oo horumarin kara dadka laftooda, oo ay ka mid yihiin joojinta cabitaanka sigaarka iyo ku noolaanshaha hab nololeed firfircoon.

Wanaag kale oo guud oo badan, oo uu ka mid yahay fursadda aad ku yeelanayso dano shakhsiyeed, ayaa qof kastaba muhiim u ah. Xaafadda Camden gudaheeda waxa ku nool qayb aad u sarraysa oo ah dadka ku jira da'dii shaqada, gaar ahaan dadka waaweyn ee ay da'doodu u dhaxayso 22 illaa iyo 44 sannadood, ee had iyo goor miisaamaya shaqada, danaha qoyska iyo dhaqdhaqaaqyada bulshada ee laga yaabo in ay ku adkeeyaan iyaga in ay ku xidhmaan beesha maxaliga ah.

Waxa kale oo aanu leenahay qaybo muhiim ah oo ka mid ah dadweynaha. Carruurta iyo dadka ay da'doodu yartahay waa mustaqbalka xaafadda wanaagooduna waa muhiim si hubaal looga dhigo in ay gaadhaan oo yeeshaan awooddooda oo buuxda. Dadka da'da ah oo ay badankoodu noolaanayaan muddo ka dheer tii beryihii hore, ayaa waxa ay doonayaan in ay helaan hab nololeed madaxbannaan si ay si firfircoon wax ugu soo biiriyaan beesha.

**Waxa illaa iyo hadda la qabtay**

Sannad walba Maareeyaha Caafimaadka Dadweynaha ee maxaliga ah ayaa qiimayn ku sameeya sida uu yahay caafimaadka iyo badbaadada xaafaddu. Waxyaabaha qiimayntaas lagu ogaadana waxa lagu qoraa oo lagu daabacaa warbixin sannadeed kaas oo isna sharxa barnaamijyada jira si arrintan wax looga qabto. Waxa jirta caddayn cad oo ah in aynu inagu saamayn aad u weyn ku yeelan karno caafimaadka dadka inaga oo yaraynayna cabitaanka sigaarka, yaraynayna naaxitaanka xad dhaafka ah, horumarinayna caafimaadka galmada iyo maanka, iyo inaga oo yaraynayna dhibaatada uu keeno aalkoladu.

Xaafadda Camden waxa kale oo ay leedahay Qorshaha Dadka ay Da'doodu Yartahay iyo Carruurta oo diiradda saaraya sare u qaadidda fursadaha nololeed iyo doorashooyinka dhammaan carruurteena iyo dhalinyarada ku nool, wax ka barta kuna barbaara xaafadda Camden. Waxa kale oo aanu ka

shaqaynaa daryeelka bulshada iyo siyaabo kale oo hubaal lagaga dhigayo in ay dadka da’da ah ee gaboobay u sii wadaan oo u helaan madaxbannaanidooda una sii wadaan in ay ka qaby qaataan beesha maxaliga ah.

Halkan ayay ku qoranyihiin qaar ka mid ah ujeedooyinka gaarka ah ee aanu ku shaqaynayno in aanu gaadhno:

- Yaraynta cabitaanka sigaarka.
- Dhiirigelinta cunitaanka caafimaadka leh iyo waxqabadka ama dhaqdhaqaaqa jidhka.
- Horumarinta helitaanka adeegyada caafimaadka galmada.
- Yaraynta xanuunada sida kansarka iyo wadne xanuunka.
- Hubaal ka dhigitaanka adeegyo badan iyo hoy la heli karo si loo daboolo baahiyaha iyo waxyaabaha ay doonayaan dadweynaha ay da’doodu sii weynaanayso ee gaboobaya.
- Yaraynta dhacdooyinka ah waxyeelidda carruurta iyo dayacaadda.
- Sare u qaadidda tirada dadka da’da ah ee dayacan ee iskood si madaxbannaani ah ugu nool guryahooda, oo lagu taageero haddii ay u baahdaan.

**Waxa ay dadku noo sheegeen**

Dadku waxa ay u malaynayeen in ay tahay in lagu dhiiriyo in ay daryeelaan oo ay ilaaliyaan caafimaadkooda, oo ay ka mid tahay ka qayb qaadashada ciyaaraha, iyo waxqabad jidhka ah. Waxa kale oo jirtey taageero loo hayey dhiirigelinta cunitaanka caafimaadka leh.

Waxa jirtey farriin adag oo ay soo gudbiyeen dadka da’da ah oo ahayd in ay dadka da’da ahi hayaan waxyaabo badan oo ay bulshada ku soo biirin karaan sidii muwaadiniin firfircoon ahaan iyo in wax badan laga qabto si looga hortago in ay dadka da’da ahi noqdaan qaar qoqoban oo faquuqan.

Carruurta iyo dadka ay da’doodu yartahay waxa ay gaar ahaan ka werwersanaayeen amniga beesha, horumarinta qalabyada loogu talogalay dadka dhalinyarada ah, caafimaadka galmada, baaditaanka iyo helitaanka fursad ay si fiican gacan ugaga geystaan in ay xaafadda Camden noqoto meel ay ku noolaadaan, wax ku bartaan kuna barbaaraan oo ay ku koraan. Waxa kale oo ay sheegeen in meelo ay tagaan waqtiga ay firaaqada yihiin ay tahay mid aad muhiim ah, laakiin ay mararka qaarkood xaddidi karto kharashku.

**Waxa ay Dawladda Hoose iyo hay’adaha kale ee la shaqeeyaa ay qaban doonaan**

- In ay qaadaan tallaabo ay ku yaraynayaan cabitaanka sigaarka.

- In ay dhiirigeliyaan hab dhaqanka caafimaadku ku jiro ee ay ka mid tahay cunitaanka cuntada caafimaadka leh iyo waxqabadka jidhku.

- In ay qof kastaba siiyaan fursado uu ku ahaado qof caafimaad qaba, wax ku barto kuna yeeshaan nololo firfircoon oo buuxa.

- In ay siyaadiyaan fursadaha nololeed iyo doorashooyinka dhammaan carruurteena iyo dadka ay da'doodu yartahay ee ku nool, wax ka barta kuna barbaaraya xaafadda Camden gudaheeda.

- In ay la shaqeeyaan dadka xagga jidhka naafada ka ah ama uu hayo xanuun xagga caafimaadka maanka ahi si ay si wanaagsan wax ugu soo biiriyaan.

**Sida ay dadka xaafadda ku nool ee maxaliga ahi ay gacan uga geysan karaan**

- Iyaga oo wax ka bedela hab nololeedkooda, iyaga oo intii hore in ka badan soconaya oo lugaynaya, qabanayo waxqabad badan oo jidhka ah isla markaana joojinaya cabitaanka sigaarka.
- Iyaga oo hubaal ka dhiga in carruurta iyo dadka ay da'doodu yartahay ee ay daryeelayaan ay heli karaan cunto caafimaad leh kana qayb qaataan waxqabad jidhka ah.
- In ay ka faa'iidaystaan waxqabadyada waxbarasho ee ay qoysasku wada samayn karaan, waxbarashada ka baxsan dugsiga, iyo fursadaha dhaqan iyo kuwa waqtiyada firaaqada.

Camden ammaan ah oo ah qayb nashaad leh oo ka mid ah dunideena magaalada

Xaafadda Camden waa meel nashaad leh oo ah qayb muhiim ah oo ka mid ah magaalada oo ay dunidu ku dhantahay. Waxa kale oo ay hoy ama guri u tahay qaar ka mid ah meelaha magaaladan London loogu jecelyahay lana aqoonsanyahay sida Carwada Ingiriiska (British Museum), Hampstead Heath iyo Suuqa Camden Lock Market.

King's Cross waa meel isbeddel iyo horumarin aad u weyni ay ka socoto waxayna u noqon doontaa meel intan ka sii muhiimsan magaalada London iyo dalkaba marka tarreenka cusub ee Eurostar train link la furo sannadka 2007. Camden Town ayaa ah meel kale oo muhiim u ah xaafadda, oo toddobaad walba soo jiidata kumanaan qof oo dalxiiseyaal ama booqdeyaal ah.

Laakiin xaafadda Camden, sida qaar badan oo ka mid ah xaafadaha ku yaalla badhtamaha magaalada London, ayay leedahay heerar aad u sarreeya oo ah dembiyada ka dhaca iyo hab dhaqanka aan bulshada ku habboonayn, gaar ahaan meelaha gaarka ah ee ay ka mid yihiin Camden Town iyo Bloomsbury. Carqaladda na hortaallaana waa in aanu dhibaatooyinkan wax ka qabano iyada oo aanu sii wadayno oo la ilaalinayo nashaadka xaafadda iyo doorkeeda magaaladan.

**Qayb ammaan ah oo kobcaysa oo ka mid ah magaalada London irridna u ah Yurub**

Hadafkayagu waa in aanu ka dhigno xaafadda Camden meel ammaan ah anaga oo ilaalinayna nashaadkeeda.

**Sababta ay arrintani muhiimka ay u tahay**

Xaafadda Camden waa meel nashaad leh dhaqankeeduna qani uu yahay laakiin waxa kale oo ay tahay meel ay dembiyada iyo hab dhaqanka aan bulshada ku habboonayn, gaar ahaan maandooriyeyaashu ay yihiin waxyaabo werwer ku haya dad badan. Xaafadda Camden waxa ay leedahay dhaqaale habeenkii ah oo kobcaya oo ku salaysan meelaha khamriga lagu cabbo, kilaabo iyo hudheelo. Dad aad u tiro badan ayaa soo booqda xaafadda waana meel lagu kala bedelo oo ay isku waydaartaan gaadiidka London. Tanina waxa ay ku sii darsamaysaa carqaladii ahayd sii waditaanka deegaan magaalo oo ay tayadiisu sarrayso, oo ay ka mid yihiin waddooyin nadiif ah, kuwaas oo gacan ka geysan kara dareenada ammaanka. Carqaladayadu waa in aanu miisaano nashaadka xaafadda – doorkayaga sidii xaafad ahaan ku taalla wadnaha magaalada London – baahida loo qabo in aanu ka dhigno meel ka sii ammaan badan sida ay imika tahay. King's Cross waxa ay gaar ahaan leedahay door muhiim ah oo ay ka ciyaarayso sidii qayb magaalada ka mid ah oo dib u cusboonaysiin lagu sameeyey.

**Waxa illaa iyo hadda la qabtay**

Guud ahaan dembiyada ka dhaca xaafadda Camden waxa ay hoos ugu dhaceen in waxoogay ka hoosaysa boqolkiiba 20% illaa iyo sannadkii 2003 kahortag iyo fulin isku jira dartood. Tusaale ahaan, illaa iyo 300 oo qof oo ah dadka maandooriyeyaasha ka ganacsada ayaa la xidhxidhay 12kii bilood ee la soo dhaafay.

Habab badan oo ka hortag ah ayaa lagu isticmaalay xaafadda oo ay ka mid yihiin barnaamijyada waalidnimada iyo heshiisyada hab dhaqanka sida Heshiisyada Hab Dhaqanka La Aqbali karo. Waxqabadka ka hortagga ah waxa kale oo ka mid ah waxqabadka liisan siinta oo lagu dhiirinayo dhaqaalaha habeenkii oo xooggan kalana duwan oo hubaal ka dhigaya tayada nolosha iyo ammaanka dadka deggan ee maxaliga ah.

In ka badan 200 oo ah amarada hab dhaqanka aan bulshada ku haboonayn (ASBOs) ayaa la soo saaray illaa iyo sannadkii 1999kii, oo badankooda la siiyey dad waaweyn. ASBOs ayaa loo isticmaalaa sidii xalka ugu dambeeya kadib marka faragelinta kale – sida dhexdhexaadinta, dhaqan celinta iyo ka leexintu – ay ku guuldaraystaan in ay wanaajiyaan hab dhaqanka qofka.

Halkan ayay ku qoranyihiin qaar ka mid ah ujeedooyinka gaarka ah ee aanu ku shaqaynayno in aanu gaadhno:

- Yaraynta dembiyada guud ahaaneed iyo hab dhaqanka aan bulshada ku habboonayn, gaar ahaan dhaca iyo dembiyada dagaalka la xidhiidha.
- Yaraynta cabsida laga qabo dembiyada.
- Yaraynta tirada dadka waaweyn iyo dadka ay da'doodu yartahay ee dib dembiyo u gala.
- Yaraynta dhibaatooyinka ay keenaan aalkolada iyo maandooriyeyaasha qayra sharciga ahi.
- Kor u qaadidda tirada dadka ah ee isticmaala maandooriyeyaasha ee ku jira barnaamijyo daaweyn ah.
- Ka hortagga carruurta iyo dhalinyarada ku lug yeelanaysa baaditaanka,hab dhaqan aan bulshada ku habboonayn iyo dembi.

**Waxa ay dadku noo sheegeen**

Maandooriyeyaasha iyo hab dhaqanka aan bulshada ku habboonayn ayaa ahaa arrin weyn oo lagaga wada hadlay wadatashigii dadweynaha. Dad badan oo ka mid ah dadka deggan ayaa waxa ay dareensanaayeen in ay arrimahani si aad ah wax ugu dhimeen tayada nolosha, gaar ahaan qaybo ka mid ah xaafadda. Camden Town ayaa had iyo goor la magacaabaa in ay tahay aagga ay ka jirto dhibaato xagga maandooriyeyaasha ah oo muuqataa. Dadku waxa ay doonayeen in loo soo sheego sida wax looga qabto dembiga iyo hab dhaqanka aan bulshada ku habboonayn iyo in ay qayb ka ahaadaan xuluusha. Dadku waxa ay dareensanaayeen in King's Cross ay tahay in loo horumariyo si faa'iidooyin u keenta dadka xaafadda ku nool.

**Waxa ay Dawladda Hoose iyo hay'adaha kale ee la shaqeeyaa ay qaban doonaan**

- In ay isticmaalaan fursado lagaga abuurayo rubuc London ka mid ah oo cusub oo xiiso leh King's Cross, oo ay ka mid tahay u horumarinteeda sidii meel dhaqan irridna u ah Yurub.

- In dadka deggan loo fududeeyo in ay soo sheegaan hab dhaqanka aan bulshada ku habboonayn.

- In wax laga qabto waxyaabaha keenaya hab dhaqanka aan bulshada ku habboonayn. Tusaale ahaan, iyada oo la bixinayo taageero waalid, oo wadata tallaabooyin fulineed.

- In la horumariyo nidaamada la socoshada dhacdooyinka ah baaditaanka iyo cunsurinimada, iyo helitaanka taageero la xidhiidha baaditaanka, haddidaadda, cunsurinimada iyo dembiga.

- In hubaal laga dhigo in beelaha kala duwan ee ku nool xaafadda Camden ay qayb ka ciyaaraan ka dhigitaanka xaafadaheena meelo ammaan ah.

- In la yareeyo cabsida laga qabo dembiyada iyada oo si shuraako ah loola shaqaynayo beesha, dadkana awood u siinaya in ay sameeyaan go'aamada isla markaana siinaya macluumaad ku habboon oo ku saabsan amniga beesha ee aagagga maxaliga ah.

**Sida ay dadka xaafadda ku nool ee maxaliga ahi ay gacan uga geysan karaan**

- In ay soo sheegaan hab dhaqanka aan bulshada ku habboonayn iyo in ay isu taagaan beeshooda maxaliga ah.
- In ay noqdaan askar (Special Constable) ama mutadawuciin u noqdaan bilayska xaafadda si ay uga caawiyaan in askar badan oo bilays ah lagu sii daayo foronta hore.
- In ay ka qayb qaataan Guddiyada Ammaanka Xaafadda ama qorsheyaasha Abaalmarinta Beesha halkaas oo ay dadka deggani ay go'aansan karaan oo go'aan ka gaadhi karaan mashaariicda maxaliga ah ee dadka dembiyada gala ee samaynaya shaqadii beesha ee lagu xukumay.
- Daryeelaya qof ay da'diisu yartahay.
- In aanay ka iibsan alaabooyinka macmalka ah dadka sida qayra sharciga ah ugu ganacsada waddada.

**Aragtida Camden Town**

Camden Town, oo ah wadnaha xaafadda ayaa dadka qaarkii jecelyihiin

laakiin qaar badanina u arkaan meel dhibaatooyin badan oo u baahan in wax laga qabtaa ka jiraan, gaar ahaan maandooriyeyaasha. Sababtan awgeed, dadka deggan iyo kuwa la shaqeeya ee ku jira Shuraakada Istaraatiijiga ee Maxaliga ahi ay u sameeyeen aragti Camden Town si looga caawiyo aagga in la horumariyo.

Kulan lala yeeshay kawnsilarada waaxda ayaa la qabtay bishii November 2006 iyo weliba falanqayno faahfaahsan oo lala yeeshay Golaha Beesha ee Camden Town iyo Degmada Horumarinta Ganacsiga ee loo yaqaaano Camden Town Unlimited.

Dadku waxa ay noo sheegeen in ay Camden Town tahay meel gaar ah oo xiiso leh oo ay ku nooshahay beel kala duwani. Laakiin waxa kale oo ay sheegeen in kala iibsiga maandooriyeyaasha oo aan lala gabanayni uu kharibayo tayada nolosha dadka deggan horumarka xaafaddana uu khatar gelinayo. Camden Town waxa ay lahayd sumcad ay muddo dheer lahayd oo dunida oo dhan looga yaqaano oo ah in ay tahay suuq lagu kala iibsado maandooriyaha loo yaqaano kaanabiska.

Aragtida beesh waa Camden Town oo kala iibsiga maandooriyeyaasha, gaar ahaan kala iibsiga maandooriyeyaasha ee muuqda ee aan lala gabanayn si weyn loo dhimay dabeecaddeeda gaark ahina ay wax u soo bandhigayso dadka xaafadda deggan iyo dalxiiseyaasha soo booqanaya ee waxyaabaha ay jecelyihiin iyo da’ahooduba kala duwanyihiin. Camden Town waxa ay u baahantahay in ay yeelato meelo ay dadka xaafaddan deggani ka soo iibsan karaan waxyaabaha ay maalin walba u baahanyihiin dhammaan dadka noocyada kala duwan ahna ay soo jiidanayso tayada sarraysa iyo dukaamada badan ee kala duwani. Dhaqaalaha waqtiga habeenkii ahi waa in uu noqdaa mid ay xiiseeyaan dadka ay da’doodu tahay afartaneeyada iyo kontoneeyada iyo dadka dhalinyarada ahi. Marka ay dadku ka fekeraan xaafadda Camden Town waa in ay xusuustaan oo ka fekeraan meelaha ay ka midka yihiin Roundhouse ee aanay xusuusan oo ka fikirin suuq ku kala iibsiga maandooriyeyaasha iyo foolxumada guud. Beelaha faqiirka ahi waa in ay la wadaagayaan guulaha badhtamaha suuqa ee kobcaya ee fursadaha shaqo ee kala duwan gaar ahaan qaybta adeegga ka jira.

LSP ayaa waxa ay aaminsantahay in si loo gaadho aragtida loo baahanyahay in uu jiro diirad saaritaan cad oo dib loogu soo noolaynayo Camden Town ee aanay ahaynuun oo keliya in la maareeyo dhibaatooyinka. Kala iibsiga maandooriyeyaasha ayaa cad in ay tahay mudnaanta ugu sarraysa waxaana lagaga hadli doonaa faragelino badan oo kala duwan oo lagu samayn doono:

- Fulinta, oo ay ka mid tahay askar badan oo dirayskii sidata oo suuqa la dhigo.
- Horumarin lagu samaynayo deegaanka muuqda ee istaytka Camden Town, oo ay ka mid tahay waddooyin, meelaha waddada dhinaceeda ah ee la maro, laydhadh, sii dhisitaanka maalgelinta weyn ee la geliyey aagga iyada oo loo marayo maalgelinta deeqda “ka dhigitaanka meel lagu noolaan karo”.
- Iyada oo fulin lagu isticmaalay dadka ka ganacsada

maandooriyeyaasha iyo horumarinada deegaanka si loo bedelo sumcadda xaafadda, iyo iyada oo si fiican loogu xayeysiiyo in ay Camden Town tahay meel uu qof kastaaba xiisayn karo.

U bedelitaanka Camden Town si loo wanaajiyo iyada oo aan la luminin waxa ay xaafaddu ku wanaagsantahay waxa ay u baahan doontaa wax ka qabasho ama faragelin taxadir leh. Dawladda Hoose iyo bilaysku waxa ay wax ka qabanayaan carqalada ah fulinta. Hadaba waxa jirta shaqo kale oo badan oo u baahan in laga qabto dhinaca deegaanka duleed iyo sumcadda xaafadda. Ganacsiga iyo dadka degganiba waxa ay dhammaantoodba gacan ka geystaan u bedelitaanka Camden Town meel sida ay imika tahay ka wanaagsan. better.

**Ka faa'iiditaanka fursadaha dhaqanka iyo firaaqada, ee ay ka mid yihiin ciyaaraha Olombiga ee London.**

Hadafkayagu waa in aanu siyaadino fursadaha dadka deggan xaafadda Camden ay kaga qayb qaadanayaan xarakaadka dhaqanka iyo firaaqada

**Sababta ay arrintani muhiimka ay u tahay**

Camden waxa ay caan ku tahay meelaheeda furan, xadiiqadaha iyo goobaha dhaqanka sida Hampstead Heath iyo Carwada Biritishka (British Museum). Waxa kale oo aanu leenahay bandhigyo beeleed badan oo kala duwan iyo dhacdooyin maxali ah oo la qabto sannadka oo dhan. Laakiin beelaha ku nool xaafadda Camden oo dhami ma dareensana in ay awoodi karaan in ay xiiseeyaan oo ka qayb qaataan dhaqdhaqaaqyada firaaqada iyo dhaqanka ee ka jira xaafadda.

Marka uu sannadku yahay 2012, dhulweynaha Yurub waxa uu noqon doona mid laba saacadood oo keliya u jira oo looga socdaalo xaafadda Camden magaaladan London iyana waxa ay martigelin doontaa ciyaaraha Olombiga iyo ciyaaraha baralimbiga (Paralympic Games). Camden waxa ay ku ballanqaadaysaa in ay u isticmaasho ciyaaraha Olombiga sidii qaar kaaliya si loo siyaadiyo waxqabadka dhaqan iyo firaaqo ee xaafadda ka jira, si looga dhigo qaar ay heli karaan dadka da' kastaba ahi isla markaana hubaal looga dhigo in ay dadka ku nool xaafaddu ka faa'iidaan ciyaaraha.

**Waxa illaa iyo hadda la qabtay**

Xadiiqadaha ku yaalla xaafadda Camden iyo meelaha bannaan ee furani waxa ay soo bandhigaan ciyaaro, qalab ciyaareed iyo dhacdooyin iyo weliba iyaga oo ah meelo aan buuq iyo qaylo lahayn oo lagu nasto. Qaar ka mid ah xadiiqadaha – sida Waterlow iyo Highgate – ayaa ku guulaystay abaalmarino lagu siiyey waxyaabaha ay ku soo biiriyeen beesha iyo guud ahaan tayada nolosha.

Goobaha ciyaaraha ayaa la horumariyey dibna loo ferreshay ee xaafadda oo

dhan. Xarunta Madadaalada ee Swiss Cottage ayaa soo jiidata 50,000 oo qof oo soo booqda bishiiba. Xarunta Ciyaaraha ee Beesha ee Talacre ayaa weli ah xarunta horumarinta ciyaarta oo muhiim ah oo London ku taalla Xarunta Ciyaaraha ee Kentish Town ayaa dib loo ferreshay.

Waxa kale oo jira goobo aad u badan oo dhaqameed oo ku yaalla xaafadda sida laga bilaabo goobaha sida Roundhouse, illaa iyo goobaha qaran ee sida Carwada Biritishka, maktabado cusub oo dib loo ferreshay oo ku yaalla Kilburn iyo Kentish Town.

Halkan ayay ku qoranyihiin qaar ka mid ah ujeedooyinka gaarka ah ee aanu ku shaqaynayno in aanu gaadhno:

- In ay dad badan oo ka mid ah dadka deggani ay ku qancaan waxqabadyada dhaqan iyo kuwa waqtiyada firaaqada.
- In ay dad badan oo ka mid dadka deggani ay ku qancaan goobaha nasashada iyo ciyaaraha.
- In ay qaar badan oo ka mid ah carruurta ay da'doodu u dhaxayso 5 illaa iyo 16 ay ka qayb qaadanayaan ugu yaraan laba saacadood oo ah waxqabad jidhka ah oo la qabanqaabiyey toddobaadkiiba.
- In loo sameeyo adeegyo la ballaadhiyey dugsiyada si carruurta looga caawiyo iyo dadka da'da yar leh in ay ku raaxaystaan oo xiiseeyaan isla markaana gaadhaan, sida kilaabada quraacda iyo waxqabadyada dugsiga dabadii ama kadib ah.

**Waxa ay dadku noo sheegeen**

Dadka deggani waxa ay noo sheegeen in ay jeclaadeen xadiiqadaha iyo meelaha bannaan ee furan ee ku yaalla xaafadda Camden, laakiin waxa ay ka werwersanaayeen dhacdooyinka waaweyn ee lagu qabto meelahaas gudahooda. Dadku waxa kale oo jeclaadeen goobaha badan ee kala duwan ee madadaalada iyo waqtiyada firaaqada ah loo isticmaalo ee ku yaalla ama laga heli karo xaafadda Camden, laakiin waxa mararka qaarkood xaddidayey arrimaha xagga kharashka iyo gaadiidka dadweynaha. Halka ay qaarkood u malaynayeen in ciyaaraha Olombiga iyo Baaralimbigu ay siin doonaan fursado, dadku waxa ay ka werwersanaayeen waxyaabaha sida kharashka waxayna shaki ka qabeen in ay dadka ku nool xaafadda Camden ay ka faa'iidi doonaan iyo in kale.

**Waxa ay Dawladda Hoose iyo hay'adaha kale ee la shaqeeyaa ay qaban doonaan**

- In ay hubaal ka dhigaan iyo goobaha dhaqanka ee qaniga ah iyo dhismeyaasha dhaxalgalka ahi ay yihiin qaar soo jiita isla markaana u furan dadka oo dhan, iyada oo la soo saarayo oo la soo bandhigayo goobaha dhaqanka ee 'Camdenta qarsoon'.

- In ay si wadajir u wada shaqeeyaan si ay u abuuraan goobo dhaqan oo cusub oo ay ka mid yihiin farshaxanka dadweynaha oo ay tayadeedu sarrayso, naqshadda magaalada oo wanaagsan isla markaana

bilicsan, iyo meelo la geli karo si loogu noolaado loogana shaqeeyo.

- In ay sii dhisaan waxbarashada dugsiga ka baxsan iyo ta beesha ee xaafadda Camden si si buuxda loogu isticmaalo goobaha dhaqan ee maxaliga ah oo ay ku jiraan Carwada Biritishka, Maktabadda Biritishka iyo goobaha tacliinta sare.

- In xaafadda Camden iskeed loogu xayeysiiyo sidii goob dalxiis ahaaneed, iyada oo laga duulayo Xidhiidhka Tarreenka Channel Tunnel ee la furi doono marka loo diyaar garoobayo ciyaaraha Olombiga ee London lagu qaban doono.

- In ay si fiican ugaga faa'iideeyaan ciyaaraha Olombiga iyo Baralimbiga ee London lagu qaban doono dadka xaafadda deggan iyo ganacsiyada isla markaana ay daabacaan qorshe waxqabad oo garab socda qorshahan, kaas oo sharxaya sida aanu:

    - Uga caawin doono carruurta iyo dadka ay da'doodu yartahay in ay noqdaan qaar intii hore ka firfircoon oo caafimaad qaba una samayn doono Golaha Naafada ee Camden marka uu sannadku yahay 2007.
    - U isticmaali doono fursadaha xagga dhaqanka iyo raaxada ee furitaanka Xidhiidhka Tarreenka ee Channel Tunnel ee laga furi doono istayshinka St Pancras 2007 marka ay ciyaaruhu soo dhowaadaana ugu dhiirrin doono dadka isla markaana isugu keeni doono beelahayaga kala duwan.
    - U siyaadin doono mutadawucidda.
    - U siyaadin doono faa'iidooyinka dhaqaale ee ay u soo saaraan ciyaaraha Olombiga ee sannadka 2012 xaafadda Camden iyada oo diiradda la saarayo fursadaha loogu talogalay dhalinyarada iyo shirkadaha yaryar.
    - U horumarinayno waddooyinkeena, xadiiqadaha iyo meelaha furan dadka ku nool kana shaqeeya dhammaan qaybaha xaafadda iyo u diyaargarowga dadka aadka u badan ee la filayo in ay soo booqdaan badhtamaha magaaladan London marka uu sannadku yahay 2012.

**Sida ay dadka xaafadda ku nool ee maxaliga ahi ay gacan uga geysan karaan**

- In ay ka qayb qaataan dhacdooyinka dhaqan iyo bandhigyada lagu qabto xadiiqadaha.
- In ay ka qayb qaataan barnaamijyada mutadawucidda ah inta ka horraysa ciyaaraha Olombiga.
- In ay wax ka ogaadaan carwada maxaliga ah ama xarunta farshaxanka marka xigtana ay saaxiibadood iyo qaraabadooda halkaas geeyaan.

**Xidhiidhada**

Si aad wax badan uga ogaatid qorshahan beesha ama si aad u codsato nuqul ah nooc gooni ah, fadlan kala xidhiidh kooxda Qorshaha Beesha:

community.strategy@camden.gov.uk

Community Strategy Team
(Kooxda Istaraatiijiyadda Beesha)
Room 305
Camden Town Hall
Judd Street
London WC1H 9BR

Tel: 020 7974 3257
Fax: 020 7974 6057

Textlink, typetalk ama minicom: 020 7974 6866

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Wada Jirka Camden gal www.camdentogether.org.uk

**Turjumaadaha**

Qoraalkan, Wada Jirka Camden, waxa uu sharxayaa aragtida xaafadda Camden ee inta u dhaxaysa sannadaha 2007 iyo 2012.

Si aad u hesho Wada Jirka Camden oo ku qoran luqaddaada, far waaweyn, cajalad ku duuban  ama podcast ah, fadlan eeg tafaasiisha xidhiidhka ee kor ku qoran. Fadlan xusuusnow in aad noo sheegto magacaaga, lambarkaaga telifoonka iyo nooca aad u baahantahay.

**Qaamuuska Ereyada**

| | |
|---|---|
| **Heshiisyada Hab Dhaqanka La Aqbali Karo** | Heshiisyo mutadawuci ah oo badanaa u dhexeeya dadka ay da'doodu yartahay ee dhibaatooyin ka abuuraya xaafadda ay ku noolyihiin , waalidiintooda ama dadka masuulka ka ah, dawladda hoose iyo bilayska. |
| **Awaamiirta hab dhaqanka aan bulshada ku habboonayn** | Amarka Tallaabo sharci oo laga soo qaato maxkamadda loona soo qaato dadka. Waxa uu dadka ku soo rogaa shuruudo lagaga hortegayo in ay dadkaasi sababaan cabsi gelin iyo dhibaato ay ku keenaan dadka kale. |
| **ATM's** | Mishiinada lacagta lagala baxo'. |
| **Degmada Horumarinta Ganacsiga (BIDs)** | Shuraako maxali ah oo ay ganacsiyadu hogaamiyaan looguna talogalay in ay horumariyaan deegaanka iyo waxqabadka dhaqaalaha ee meelo la cayimay sida Holborn. |

| | |
|---|---|
| | Ganacsiyadu waxa ay dusha kala socdaan oo maamulaan oo ay maalgeliyaan horumarinaha sida nadiifinta waddooyinka, ururinta qashinka iyo amniga dadweynaha. |
| **Shuraakada Ganacsiga ee Camden** | Kooxdani waxa ay fududaysaa wada hadalada u dhexeeya Dawladda Hoose, ganacsiyada iyo hay'adaha kale ee la xidhiidha. Ujeedadeeduna waa in ay ka caawiso ganacsiyada in ay si fiican u fahmaan shuruudahooda kaantaroolka isla markaana ay u siiso fursad ay ku helaan fursadaha xidhiidhinta. |
| **Shebekedda Awood Siinta Beesha ee Camden (CamdenCEN)** | Shebekedda Awood Siinta Beesha ee Camden waxa ay isu keentaa ururada beesha iyo kuwa mutadawuca ah ee ka shaqaynaya xaafadda Camden. Ujeedadeedu waa in ay ka caawiso ururada beesha iyo kuwa mutadawuca ah iyo kooxaha in ay la socdaan oo ka warqabaan arrimaha istaraatiijiga ah iyo in ay saamayn ku yeeshaan qorshaynta istaraatiijiga ah iyo go'aan gaadhista xaafadda gudaheeda. |
| **Hay'adda Daryeelka Bilowga ee Camden (PCT)** | Hay'adda Daryeelka Bilowga ah ee Camden PCT waxa ay masuul uga tahay xaafadda Camden dhammaan adeegyada daryeelka caafimaad ee beesha iyo kuwa bilowga ah. Daryeelka bilowga ah waxa ka mid ah farmasiyaasha, dhakhaatiirta ilkaha, dhakhaatiirta indhaha iyo dhakhaatiirta qoyska. Daryeelka beesha waxa ka mid ah adeegyada ay ka midka yihiin adeegyada caafimaad ee dadka guryahooda ku booqda iyo kalkaalinta degmada. PCT waxa kale oo ay u maamushaa dadweynaha xaafadda Camden ku nool adeegyada caafimaadka maanka iyo kuwa aadka ah. |
| **Wada Jirka Camden** | Waa magaca qorshaha horumarinta beesha ee Camden ee sannadaha 2007-2012. |
| **Golaha Beesha ee Camden Town** | Waa koox ay ka mid yihiin dadka deggani, oo ka hadasha arrimaha ammaanka iyo dib u soo noolaynta ee Camden Town. |
| **Camden Town Unlimited** | Waa Degmada Horumarinta Ganacsiga (eeg qeexitaanka sare) ee uu saldhigeedu yahay Camden Town. |
| **Xaffiiska Shaqada ee Camden (Camden Working job shop)** | Waa adeeg shaqo, oo xarun shaqaalaynta ah ku leh Camden Town, oo shaqooyin dhab ah u soo hesha dadka deggan xaafadda Camden. |
| **Raadka Kaarboonka** | Waa kelmed loo isticmaalo si loogu sharxo saamaynta ay dadka iyo ururadu ku leeyihiin deegaanka iyo illaa iyo inta ay sababaan sii deynta kaarboon dhayogsaydhka tallaabooyinkooda dartood. |

| | |
|---|---|
| **Shuraakada Carruurta iyo Dadka ay Da'doodu yartahay** | Guddida Shuraakada Carruurta iyo Dadka ay Da'doodu yartahay waxa ay la socdaan hirgelinta Qorshaha Carruurta iyo Dadka ay Da'doodu yartahay ee Camden. |
| **Qorsheyaasha Abaalmarinta Beesha** | Abaalmarinta Beeshu waa shuraako ka dhaxaysa Borobayshanka London, Adeegga Bilayska London iyo dawladaha hoose. Waxa ay ka caawisaa in shaqada lacag la'aanta ah ee ay qabtaan dadka dembiyada galay ee lagu xukumay in ay si lacag la'aan ah beesha ugu shaqeeyaan ee London ay dadweynuhu aqoonsadaan, waxayna u ogolaataa dadweynaha in ay gacan ka geystaan oo ku soo biiriyaan fikrado shaqo mashaariic. |
| **Qorshaha Isutagga ee Dawladda Hoose** | Waa qorshe sharxaya ujeedooyinka iyo ahdaafta Dawladda Hoose ee Camden. |
| **Kawnsilarada (Councillors)** | Xubnaha siyaasadeed ee la soo doortay ee Dawladda Hoose. Waxa ay xaafadda Camden leedahay 54 kawnsilar. |
| **Shuraakada Ganacsiga ee Waxbarashada** | Shuraakadani waxa ay xidhiidh ka dhex samaysaa dugsiyada, ganacsiyada iyo ururada beesha. |
| **Barnaamijyada Taageerada Shirkadda** | Waa qorshe taageero oo ay Dawladda Hoose siiso dadka doonaya in ay sameeyaan ganacsiyo ay iyagu leeyihiin. |
| **Shuraakada Diimaha Beesha ee Camden** | Shuraako madaxbannaan oo ka kooban dhammaan kooxaha diimaha muhiimka ah ee ka jira xaafadda Camden. |
| **GDP** | Gross Domestic Product – waa hab lagu cabirayo dakhliga dalkan UK. |
| **Golaha Dumarka Isutaga, Ragga Isu Taga, Kuwa labadaba u taga iyo Dadka Sinjigooda Bedela (LGBT Forum)** | Golahani waxa uu metelaa aragtiyaha kooxahan ee xaafadda gudaheeda. |
| **Ka dhigitaanka meel lagu noolaan karo (Liveability)** | Illaa iyo heerka ay magaalo ama meeli tahay meel la heli karo, nadiif ah isla markaana tahay meel ay dadku doortaan in ay ku noolaadaan kana shaqeeyaan.<br>Waxa jirta maalgelin ama deeq ay bixiso dawladda dhexe oo loogu talogalay mashaariicda lagu horumarinayo ka dhigitaanka meel meel lagu noolaan karo. |

| | |
|---|---|
| **Heshiiska Aagga Maxaliga ah (LAA)** | Heshiisyada Aagga Maxaliga ahi (LAAs) waxa ay sharxayaan mudnaanaha aagga maxaliga ah ee ay isku waafaqeen dawladda dhexe, dawladda hoose, Shuraakada Istaraatiijiga ee Maxaliga ah iyo hay'adaha kale ee muhiimka ah ee la shaqeeya ee ah heerka maxaliga ah. Heshiisyaa LAAs waxa ay fududeeyaan qaar ka mid ah maalgelinta dhexe, waxa ay caawimo ka geystaan in si waxtar leh la isugu geeyo adeegyada dadweynaha iyo iyaga oo ogolaada in in badan la bedbeddeli karo xuluusha maxaliga ah ee duruufaha maxaliga ah. Waxa ay ka koobanyihiin ahdaaf farabadan oo si joogto ah loola socdo. |
| **Shuruucda Horumarinta Maxaliga** | Waa qoraal istaraatiiji ah oo muhiim ah oo loogu talogalay nidaamka qorshaynta ee xaafadda iyo sida dhulka maxali ahaan loogu isticmaalay.<br>Shuruucdani waxa ay bedeleen Shuruucda Horumarinta Unugyada. |
| **Shuraakada Istaraatiijiga ee Maxaliga ah** | Shuraakada Istaraatiijiga ee Maxaliga ah ee Camden (LSP) waxa ay isu keentaa qaybaha beesha iyo mutadawuca ah, gaarka ah, iyo dadweynaha ee xaafadda Camden si tayada nolosha loogu horumariyo dhammaan dadka ku nool, ka shaqeeya ama soo booqda xaafadda. |
| **Xaffiiska Shaqada ee Adeegga Caafimaadka Qaranka (NHS job shop)** | Waa adeega dadka shaqaalaysiiyaa oo maxali ah oo ay bixiso Camden PCT, saldhigeeduna yahay Kentish Town. Waxa ay dadka xaafadda deggan ka caawisaa oo ay shaqooyin ka siisaa Adeegga Caafimaadka Qaranka (NHS) ee maxaliga ah. |
| **Barnaamijka Maalgelinta ee Shirkadaha Gaarka Loo Leeyahay** | Waa heshiis sharci ah oo ku lug leh shirkadaha sida gaarka ah loo leeyahay ee bixiya adeegyada dadweynaha, gaar ahaan dhismeyaasha dadweynaha. Shirkado shuraako ah oo si gaar ah loo leeyahay, oo sida caadiga ah ay ku jiraan shirkadaha wax dhisa ee waaweyni, ayaa la siiyaa qandaraas ah in ay naqshadeeyaan, dhisaan, mararka qaarkoodna ay maamulaan mashaariic cusub. Qandaraasyadu waxa ay sida caadiga ah ku dhammaadaan muddo 30 sannadood ah, oo ay inta lagu jiro muddadaas dhismaha kirayso hay'ad dadweyne. |
| **Golaha Qaxootiga** | Waa koox ka kooban hay'ado badan oo ay ku jiraan wakiilo ka kala socda Dawladda Hoose, hay'adda daryeelka bilowga ah (PCT), xaffiiska shaqada (JobCentre Plus), Golaha Waxbarashada iyo Xirfadaha iyo ururada qaxootigu. Ujeedada kooxdu waxa weeye in ay hab istataatiiji ah u samayso dhexgelitaanka dadka qaxootiga ah ee xaafadda. . |

| | |
|---|---|
| **Hantiileyaasha Bulshada ee Diiwaangashan** | Ururo ay diiwaangelisay ogolaatayna Iskaashiga Guryuhu si ay u bixiyaan guryo bulsho oo kiro ah. Intaas waxa dheer qaar ka mid ah hantiileyaashan RSLs oo dhisa guryo la awoodi karo, iyaga oo badanaa si wadajir ah ula shaqaynaya shirkadaha ganacsiga ee dhismaha ka shaqeeya, guryahaas oo lagu iibiyo wada yeelasho. |
| **The Roundhouse** | Waa goob ku taalla Camden Town oo qabata barnaamijyo dhacdooyin ah oo ay ka mid yihiin muusiga iyo tiyaatar. |
| **Guddiyada Ammaanka Xaaffadda** | Waa goleyaal ay maamulaan Bilaysku oo ay ujeedadoodu tahay in ay helaan aragtiyaha dadka xaafadda deggan ee ogaanshaha iyo wax ka qabashada arrimaha werwerka ku haya ee ka jira xaafaddooda. Waxa ka jira xaafadda Camden 18 guddi – waaxdiiba mid. |
| **Golaha Talobixinta Ishaysashada Beesha** | Waa gole cusub oo dhiirinaya isdhexgal intan ka badan iyo beelo qani ah oo isla xaafadda Camden gudaheeda ah. |
| **Horumarin waarta** | Hadafka horumarinta waartaa in laga caawiyo dhammaan dadka dunida ku nool in ay daboolaan baahiyahooda aasaasiga ah isla markaana ay ku noolaadaan nolol ay tayadeedu intan ka wanaagsantahay, iyada oo aan lagu khamaarayn tayada nolosha ee jiilalka mustaqbalka. Tanina waxa ay la xidhiidhaa ilaalinta iyo kobcinta deegaanka dabiiciga ah iyo kan duleed, iyo u isticmaalidda iliilaha iyo tamartaba si waxtar leh ee ugu caqligalsan. |
| **Qorshaha Horumarinta Beesha** | Waa qorshe mustaqbalka eegaya oo ay ujeedadiisu tahay in lagu horumariyo badbaadada dhaqaalaha, bulshada iyo deegaanka xaafadda. Waa qoraal sharci ah oo sharxaya aragtida iyo mudnaanaha aagga maxaliga ah oo ay hogaamiyaan Dawladda Hoose iyo shuraakada Istaraatiijiga ee maxaliga ah. |
| **Shaqo haysan** | Waa kelmed lagu sharxo dadka shaqo la'aanta ah ama aan shaqo haysan. |